# Buug-gacmeedka Shatiga Darawalnimada ee Maine

**Xoghayaha Gobalka, Shenna Bellows**

## SHAXDA MAWDUUCYADA

**QAYBTA 1 – SHATIGAAGA DARAWALNIMO ……………..…………..……….….……1-1**
Hordhac …………………………………………………….……..………………..……..1-1
Qaadashada Shatiga Darawalnimo ee Maine ……………………….…..……….………1-2
Noocyada Shatiga Darawalnimada iyo Ogolaanshiyaasha Darawalka ……..…..…………………..1-3
Imtaxaanaadka Qasabka ah ee Shatiga Gaadiidka Gaarka ah ……………..……………………...1-3
Shati Gobal Kale Bixiyay ama Gaari Ku Wadista Shati horey u Jirtay …….………….……….…1-5
Cusbooneysiinta Shatiga Darawalnimada ………………………………..……………….…1-6
Luminta Xuquuqaha Gaari Wadista ………………………………..…………..…………1-6
Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 1 ……………………………………………………..…1-11

**QAYBTA 2 – SHARCIGA IYO XEERARKA GOBALKA ………….…....……………….2-1**
Sabbarloogaynta Gaarigaaga ………………………………………….……………….…2-1
Diiwaan Gelinta Gaarigaaga ……………………………………….………………....…2-2
Caymis u samaynta Gaarigaaga.…………………………………………………...………2-3
Kormeerida Gaarigaaga.………………………………………………………………………2-4
Ilaalinta Gaarigaaga.……………………………………………………………………..…2-5
Qalabka iyo Agabka ………………………………………………………………………2-6
Dhawaaqa Xad dhaafka ah ee Nidaamka Guuxa ………………………………………2-6
Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 2 ……………………………………………………2-6

**QAYBTA 3 – U DIYAARSAN GAARI WADIS.…………………….......................…………..3-1**
Aragga iyo Maqalka ………………………………………………….………………3-1
Daalka ……………………………………………….………………………...…….…3-1
Waxyaabaha Mashquuliya Darawalka …………………………………….…..…..…3-3
Gaari Wadis Gardarro Leh ……………………………………………..……...………..…3-5
U diyaarsanaanta Gaari Wadista (Khamriga iyo Daroogada) ...................................................…3-5
Shucuuraha ……………………………………………………….…………………3-15
Caafimaadkaaga ……………………………………………….…………………3-15
Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 3 ………………………………..…………………..…3-16

**QAYBTA 4 – KAHOR INTA AADAN GAARI WADIN ………………………….…………..…4-1**
Sixidda Kursigaaga iyo Muraayadaha ……………………………………………….……….4-1
Xirashada Suumanka Badqabka ……………………………………………………………..4-2
Boorso haweedka.……………………………………………………………………...…4-3
Ilaalinta Badqabka Carruurta ……………………………………………………………...4-4
Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 4 ………………………………………………..……4-5

**QAYBTA 5 – BILOOWGA ……………………………………………………………5-1**
Kicinta Matoorka ……………………………………………………………5-1
Horay U Socoshada ……………………………………………………………5-1
Joogsiga ……………………………………………………………5-2
Isteerinka ……………………………………………………………5-3
Gadaal U Bixida ……………………………………………………………5-3
Ilaalinta ……………………………………………………………5-4
Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 5 ……………………………………………………………5-4

**QAYBTA 6 – XEERARKA WADADA ……………………………………………………………6-1**
Wadista Gaari……………………………………………………………6-1
Waddo Marida U Xaq Leh……………………………………………………………6-1
Xakamaynta Gaadiidka……………………………………………………………6-3
Tilmaamaha Taraafikada ……………………………………………………………6-3
Calaamadaha Taraafikada ……………………………………………………………6-4
-Calaamadaha Digniinta ……………………………………………………………6-4
- Isgoyska Wadada Tareenka ……………………………………………………………6-5
- Calaamadaha Aaga Shaqada ……………………………………………………………6-5
- Calaamadaha Sharciga ……………………………………………………………6-6
- Calaamadaha Tilmaanta ……………………………………………………………6-7
- Calaamadaha Lambarka Wadada ……………………………………………………………6-7
Calaamadaha Geeska Wadada ……………………………………………………………6-8
- Calaamadaha Laynka Jaallaha ah ……………………………………………………………6-8
- Calaamadaha Laynka Cad ……………………………………………………………6-8
Adeegsiga Seedadka ……………………………………………………………6-8
- Gudubfarowga iyo Seedadka Joogsiga ……………………………………………………………6-11
Xakamaynada Kale ee Laynka ……………………………………………………………6-12
- Laynka Leexashada dhanka Bidix ee Dhexda Wadaaga ah ……………………………………………………………6-12
- Seedadka Gadaal looga Bixi karo ……………………………………………………………6-12
Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 6 ……………………………………………………………6-13

**QAYBTA 7 – GAARI WADISTA GUUD ……………………………………………………………7-14**
Leexasho ……………………………………………………………7-14
Isgoysyada ……………………………………………………………7-14
Wareegga Taraafikada iyo Goobooyinka ……………………………………………………………7-15
Layn Baddelasho ……………………………………………………………7-16
Ku wadidda gaari waddada xawaaraha sare ……………………………………………………………7-17
Dhaafid ……………………………………………………………7-19
Xeerarka Basaska Dugsiga ……………………………………………………………7-21
Baarkimid ……………………………………………………………7-22
- Baarkinka Qotonson iyo Xagal baarkimida ……………………………………………………………7-24
- Baarkin Siman ama Baarkin Taxan……………………………………………………………7-24
Dib u Leexasho ……………………………………………………………7-26
7 Su'aalaha Layliga ee Qeybta 7……………………………………………………………7-27

**QAYBTA 8 – MAARAYNTA WAKHTIGA IYO MASAAFADA ……..…………….……....8-1**
Arkaya Wax Khatar ah ………….……………………………….…………….….……...8-1
Eeg Dhinacyada ……………….………………………………….…………….…………...8-2
Eeg Gadaal ……………………………………………………….……….…….………...8-3
Maaraynta Xawaaraha ………………………………………………………..………....8-5
- Isku diyaarinta xaaladaha waddada ………………........………....……………8-6
- Xoodooyin/qalqallooc ………...........………………........……………….....……….8-6
- Waddooyin Sibiibix ah ………….……………………........……………………….....8-6
- Taayar/sheeg simbirixasho ……….…………….........…………………………….8-7
- Waddooyin Daad leh …………………………........………………………….…..…8-7
Masaafada Joogsiga ………..…………………………………………………..……8-7
Xaddidka Xawaaraha ……..……………………………………………………………8-7
Maaraynta Masaafada ……………………………………………………………....8-11
- Masaafada Hortaada ah …………….........………………………….……....8-11
- Masaafada Dhinacyada …………….........……………………………………….8-13
Masaafada Dambe waxay Saameeyaa Masaafada ka Fogaanshaha ……………………….....8-14
La xiriirid ………………………………………………………………………………...8-15
- Tilmaamida Jiho Beddelashada ………………........……………………………8-17
- Dhigidda Gaarigaaga Meel laga la Arki karo …………………........……………..…8-19
Su'aalaha Muraaajacada ee Qaybta 8 ……………………………………………..…..8-19

**QAYBTA 9 – KA FOGAANSHAHA SHILALKA ……………………………..……...……9-1**
Gurmadka iyo ka Fogaanshaha Shilalka …………………………………..…………9-1
- Bareeg-qabashada ……………………………………………………………...9-1
- Isteerin wareejin ……………………………………………………….......9-1
- Xawaarayn ……………………………………………..……………...…....9-2
Is-difaacid xilliga Isku dhaca / shilka ……………………………………………..…....9-2
- Shilalka ………………………………………………………………...………9-3
Gargaarka Xaaladda Degdegga ah ………………………………………………..……9-4
- Rakooyinka ………………………………………………………..…..………9-4
- Qorarka/Sagxadaha aan sinnayn ……………………………………………….…....9-4
Ciladaha Gaariga ……………………………………………………..……………..……....9-5
- Bareeg Go’id ………………………………………………..………………….....9-5
- Bareeg Oolyo leh ………………………………………………..……………….9-5
- Taayar Qarxay ……………………………………………………………………....9-5
- Sheelaro Katibmay ………………………………………………………..………….9-6
- Cilad farsamo ……………………………………………………………...…..9-6
- Haddii Matoorkaaga Biyo galaan ………………………………………………..…9-6
- Haddii Gaarigaagu ku istaago Wadada Tareennada ……………………….………9-6
- Haddii gaari ku soo socdo Laynkaaga …………………………………..……...…9-6
- Haddii Baytariga Gaarigaagu Dhammaado …………………………………..………9-7
- Haddii Gaarigaagu Biyo ku dhex Dhaco …………………………………………....…..9-7
Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 9 ……………………………………………………...9-7

**QAYBTA 10 – WADDO WADAAGID ………………………..……….…………………..…..…..10-1**
Lugeeyeyaal ………………………………………………………….………………………...10-1
Baaskiilo …………………………………………………………….………………………..…..10-1
Mootooyin mise Dhugdhugley ……………………………….…………………...……..10-5
Gawaari wayn ……………………………………………….……………………………10-5
Gawaarida Gurmadka ……………………………………….………………………....10-9
Joogsiyada Booliska/ Taraafikada ………………………………………………….……………10-10
Sharciga Wado uga Bixidda ……………………………………………………..…..…..10-10
Gawaarida Gaabiska ku Socda ……………………………………………………..…..….10-11
Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 10 ……………………………………...………………....10-12

**QAYBTA 11 – CAQABADAHA GAARKA AH EE GAARI WADISTA ………...…………..11-1**
Kaxaynta gaari Habeenkii ……………………………………………………...………...…..11-1
Aad Shaqo ………………………………………………………………………...……………..11-1
Waddooyinka Miyiga ……………………………………………………………...…………11-3
Xaaladaha gaari Wadista Khatarta leh ……………………………………………...………...11-4
Badqabka Duurjoogta ………………………………………………………...…………11-7
Rakaab Qaadidda iyo Xammuulka ……………………………………………...…………11-8
Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 11 ……………………………...…………..……...…11-9

**QAYBTA 12 – TIJAABI AQOONTAADA…………………………………………………..12-1**

Lifaaqa A
- Asbaabta Caadiga ah ee Diidmada Imtixaanka Gaari wadidda
- Macluumaadka Imtixaanka Gaari wadidda
- Tilmaamaha Imtixaanka Gaari wadidda
- Sharciga degganaanshaha/Warqadaha Deggenaanshaha ee Sharciga ah

QAYBTA 1

# Shatigaaga Darawalnimo

## Hordhac

Ruqsada Darawalka ayaa ku siinaysa madax banaani iyo xoriyad cusub – iyo sidoo kale masuuliyad keligaa ah.

Qof kasta oo wadada maraya ama wadada u dhow – laga bilaabo darawalka ilaa baaskiilaha ku feer socda ilaa qofka ku lugaynaaya geeska wadada – wuxuu isku halaynayaa adiga inaad feejignaato marka aad gaariga wado. Waa inaad markasta u diyaar garoowdaa suuragalnimada ah inaad u baahanayso inaad joogsato, leexato, xawaarayso ama xawaaraha dhinto si aad iskaga ilaaliso isku dhaca gaadiidka. Taas ayaa ka dhigan inaad u baahan tahay inaad dareenkaaga oo dhan saarto wadada aadna markasta ilaaliso anshaxa darawalnimada.

Noloshaada, nolosha rakaabka iyo nolosha darawallada kale, baaskiileeyda iyo dadka lugaynaaya ayaa ku xiran awoodaada gaari u wadista si amaan ah. Haddii ay ku naafeeyaan daroogooyin ama khamri, ama haddii aad fariin qoraal qorayso ama aad eegayso wax aan ahayn hortaada, waxaad khatar gelinaysaa nolosha.

Shilalka masiibada ah ee lagu dhinto ayaa dhammaan badanaa dhaca, waxaana inta badan sababa qof jebinaaya sharciga. Waxa aan badanaa laga waramin waa dhammaan isku dhacyada gaadiidka ay kahortageen darawallada feejigan, aan maandooriyaha cunin, faraha fudud oo raaca xeerarka wadada.

Laanta Gaadiidka Matoorka ku Shaqeeya ee Maine ayaa la aasaasay sanadkii 1905 sabab la xiriirta walaac laga qabay badqabka dadwaynaha markii ay biloowdeen gaariaasha matoorka ku shaqeeya. Maanta, way adag tahay in la cabiro khataraha wakhtigaas jiray maadaama ay farduhu ka badnaayeen gaariyaasha wadooyinka maraaya. In ka badan 100 sano, Laanta Gaadiidka Matoorka Ku Shaqeeya (BMV) ayaa muhiimada ku saartay shaqadeena kor u qaadistabadqabka wadooyinka Maine ayadoo xaqiijinaysa kartida siineysana ruqsad darawallada, sidoo kalena ilaalinaysa diiwaannada taariikhda darawallada, mulkiyada gaariyaasha iyo diiwaan gelinta gaariyaasha. Buug tusmeedkaan waxaa loo sameeyay inuu kuu diyaariyo aqoonta iyo xirfadaha aad u baahan tahay si aad qaab amaan ah ugu wado gaari aadna u ilaashato ruqsada darawalnimada.

Hase yeeshee, qaadashada ruqsadaada darawalku waa keliya biloow. Fadlan xasuusnoow in xirfadaha, habdhaqannada, iyo xeerarka wadada ee aad maanta baranayso ay ka badan tahay keliya jawaabaha imtaxaanka. Gaari wadista amaanka ah waa masuuliyad ku saaran inta aad nooshahay oo dhan waana mid u baahan inaad xaqiijiso mar kasta oo aad gaari wadayso.

Inta aad qaadayso talaabooyinkaaga koobaad ee qaadashada ruqsad aad ku wado gaari matoor leh, waxaan kugu boorinayaa inaad naftaada u balan qaado in aad diyaar u ahaado markasta oo aad gaari wadayso. Waxaan kuu rajaynaynaa inaad guul ka gaarto qaadashada shatigaaga darawalnimada, aadna u raaxaysato dhammaan xoriyada iyo fursadaha aad helayso inta noloshaada ka dhiman.

Daryeel Naftaada,

Shenna Bellows
Xoghayaha Gobalka

## Qaadashada Shatiga Darawalnimo ee Maine

Ku wadista gaari matoor ku shaqeeya wadooyinka waawayn ee dadwaynaha ee Maine waa faa'iido iyo masuuliyad aad u culus oo wada socda. Awooda wadista gaari, xamuul ama mooto ayaa kordhinaysa badkaaga. Waxay kuu sahlaysaa inaad shaqeyso, booqato saaxiibada, aadna ku raaxaysato wakhtigaaga fasaxa.

Gaari matoor ku shaqeeya oo loo adeegsaday si doqonimo ah ama si taxadar la'aan ah, ayaa dhalin kara geeri. Kumanaan dad ah ayaa ku dhinta sanad kasta Mareykanka sabab la xiriirta shilalka gaariyaasha matoorka ku shaqeeya. Si aad u qaadato shatigaaga darawalnimada waa inaad taqaanaa xeerarka wadooyinka iyo sida qaab amaan ah loogu wado gaari ama gaadiid kale wadada. Inaad ahaato darawal amaan ah, caqli badan ayaa u baahan wakhti iyo dedaal, laakiin hawsha ayaa keliya bilaabata marka aad hesho shatiga.

### Yaa u baahan Shatiga Darawalnimo ee Maine?

- Qof kasta oo dagan Gobalka kaasoo doonaaya inuu gaari ku wato Maine. Dadka cusub ee soo daga kuwaasoo haysta shatiga darawalka ee ka yimaada gobal kale waa inuu soo wareejiyaa shatigaas uuna shatiga darawalnimada ka codsadaa Maine 30 maalmood gudahood kadib marka uu deegaan ka dhigto gobalkaan.

### Yaan u Baahnayn Shatiga Dawalnimada ee Maine si uu gaari Ugu Wado Maine?

- Qof kasta oo deegaanka ah kaasoo haysta ogolaanshaha ardaynimada ayaa wadi kara gaari haddii uu la socdo darawal shati leh kaasoo ugu yaraan jira 20 sano haystayna shatiga saxda ah ugu yaraan 2 sano. Darawalka shatiga haysta waa inuu fadhiyaa kursiga ku xiga darawalka haysta ruqsada ardaynimada.
- Qof kasta oo aan gobalka daganayn kaasoo jira ugu yaraan 16 sano haystana shatiga dawaralka oo sax ah ama ruqsada ardaynimada oo uu ka haysto gobalka uu dagan yahay.
- Shaqaale kasta oo milatariga ka tirsan kaasoo haysta ruqsada saxda ah ee wadista gaadiidka milatariga.

### Sidee ayaad Shati uga Helaysaa Maine?

- Waa inaad jirtaa ugu yaraan 15 sano.
- Haddii aad ka yar tahay 18 sano jir waa inaad dhamaysataa koorsada waxbarashada darawalka ee la ogol yahay.
- Si aad u hesho ruqsada ardaynimada waa inaad si buuxda u dhamaysataa imtaxaanka qoran ee aqoonta darawalka. Ruqsada ardaynimada ayaa caadiyan shaqeyn karta 2 sano. Waxay u sahlaysaa qofka inuu wado gaari marka uu la socdo darawal shati leh kaasoo ugu yaraan jira 20 sano haystayna shatiga saxda ah muddo 2 sano ah. Darawalka la soconaaya waa inuu shati u haystaa wadista nooca gaariga qofku wadaayo.
- Adeegsiga taleefannada gacanta ama aaladaha elektaroonigga ah ee gacanta lagu qaato ayuu mamnuucayaa sharcigu marka aad gaari ku wado Maine.
- Imtaxaanaadka qoran iyo shaashadaha la daawado ayaa lagu baxshaa qaab jadwalaysan dhammaan laamaha xafiisyada Gaariyaasha Matoorka ku shaqeeya. Labo nooc oo aqoonsi ayaa loo baahan yahay. Tusaalaha, ayaa noqon kara, shahaadada dhalashada iyo kaarka Social Security. Inkastoo aah lambarkaaga Social Security aan lagu qori doonin shatigaaga, waa in la keenaa marka la codsanaayo ama la cusbooneysiinaayo shatig. Shahaadooyinka dhalashada ama Baasaboorada ayaa laga doonayaa codsadeyaasha jira ayna ku jiraan kuwa da'da 22 sano si loo go'aansho taariikhda ay dhasheen. Footo koobiyada shahaadooyinka dhalashada waa inay leeyihiin tiimbare ama saxiix ay saartay wakaalada soo saartay. Nuqullada nootaayada leh lama aqbali doono.

## Noocyada Shatiga Darawalnimada iyo Ogolaanshiyaasha Darawalka

**Nooca Shatiga (Noocyada Gaariyaasha)**
**Maine wuxuu leeyahay 3 heer oo shatiyada darawalka ah.**

- Heerarka A iyo B: Shatiyada heerka A iyo B waa shatiyada gaariyaasha ganacsiga waxaana lagu aqoonsadaa xajmiga iyo miisaanka gaariga la wadaayo. Shatiga Heerka A waxaa ku jira noocyada gaariyaasha leh miisanaka guud oo dhan 26,001 ama xajmi intaas ka culus marka la xaqiijiyo in miisanaka guud ama cabirka miisaanka gaariga la jiidanaayo uu ka badan yahay 10,000 oo rodol. Heerka B waxaa ku jira gaari kasta oo keli ah oo leh cabirka miisaanka guud ee gaariga oo dhan 26,001 ama miisaan ka badan ama gaari kasta oo noocaas ah oo xanbaaraaya gaariga oo aan ka badnayn 10,000 oo rodol wadarta guud ee miisaanka gaariga. Dadka haysta Shatiga Heerka A ama B ayaa, marka ay helaan ayidaad ku haboon, wadi kara dhammaan gaariyaasha Heerarka B iyo C.
- Heerka C: Heerka C waa nooca shatiga caadiga ah oo la siiyo inta badan darawallada gaariyaasha. Shatiga Heerka A waxaa ku jira gaari kasta oo keli ah ama iskudarka gaariyaasha aan buuxin qeexitaanka Heerka A ama B. Shatiga Heerka C waa shatiga darawalka gaadiidka ganacsiga keliya haddii uu leeyahay ayidaada qaadista maadooyinka khatarta ah, taangiga iyo/ama rakaabka. Dadka haysta Shatiga Heerka C ayaa, marka ay helaan ayidaad ku haboon, wadi kara dhammaan gaariyaasha heerkaas.

Buugaagta tusmada waxbarashada gaarka ah ayaa la heli karaa si loogu adeegsado waxbarasho ahaan marka la codsanaayo shatiga darawalka gaadiidka ganacsiga ama ayidaada mootada.

Basaska dugsiga, basaska rakaabka iyo mootooyinka ayaan lahayn heer gaar ah, laakiin isticmaalkooda ayaa u baahan ayidaad gaar ah iyo imtaxaan loo galo gaariyaashaas.
**FIIRO GAAR AH:** Codsadeyaasha shatiga baska dugsiga waa qasab inay jiraan 21 sano ama ka wayn ayna haystaan ugu yaraan hal sano oo khibrada darawalnimada shatiga leh ah. Waxaa intaas dheer, qof kasta oo lagu xukumo khaladka O.U.I. tobankii sanoo ee lasoo dhaafay ayaan u qalmin inuu qaato shatiga darawalka baska dugsiga.

Dhugdhugleeyda ayaa lagu wadi karaa shatiga heer kasta. Dhug-dhugleyda ama bajaajta waxaa keliya wadi kara qof haysta shatiga saxda ah ee heer kasta, ruqsada saxda ah ee ardaynimada ama ruqsad leh ayidaada mootada ama dhugdhugleyda.

## Imtaxaanaadka Qasabka ah ee Shatiga Gaadiidka aan ahayn Kuwa Ganacsiga

**Sidee ayaad Shati uga Helaysaa Maine?**

- Waa inaad jirtaa 16 sano aadna dhamaysataa koorsada waxbarashada darawalka ee la ogol yahay.
- Waa inaad jirtaa ugu yaraan 18 sano jir haddii aadan dhamaysan koorsada waxbarashada darawalka ee la ogol yahay.
- Kahor inta aan qof ka yar 21 sano codsan imtaxaanka wadada, qofkaas waa inuu haystay ruqsada ardaynimada muddo 6 bilood ah laga bilaabo taariikhda la baxshay ruqsada ardaynimada waana inuu dhamaystaa ugu yaraan 70 saacadood oo gaari wadis ah, ayna ku jirana 10 saacadood oo habaynkii ah, asagoo uu la socdo darawal shati leh kaasoo jira ugu yarana 20 sano haystayna ruqsad sax ah ugu yaraan 2 sano. 70 saacadood ee tababarka darawalnimada ah ayaa bilaabanaysa marka la siiyo ruqsada. Waalidka, xaaska waalidka, masuulka, ama xaasku waa inuu ku cadeeyaa wakhtiga qofku gaariga waday qaabka uu baxshay xoghayaha Gobalku. Marka qof uusan haysan waalid

xaaska waalidkiis, masuul, xaas, ama cida uu u shaqeeyo ayaa xaqiijin kara wakhtigiisa darawalnimada.

- Waa inaad si buuxda ugu baastaa imtaxaanka wadada. Marka aad diyaar u tahay inaad gasho imtaxaanka wadada waxaad foomka codsiga imtaxaanka wadada ama diiwaanka darawalnimada ee lagu siiyay boostada ugu diraysaa Xafiiska Guud ee Gaariyaasha Matoorka ku shaqeeya oo ku yaala Augusta. Intaas kadib waxaa laguu mudeyn doonaa imtaxaanka wadada oo lagu qabanaayo goob imtaxaan oo gurigaaga u dhow. Keen ruqsadaada ardaynimada iyo ogeysiiska balanta balantaas mudeysan. Darawalladu waa inay la yimaadaan gaarigooda, kaasoo si fiican u diiwaan gashan (keen diiwaanka) oo lasoo dayactiray, si ay ugu galaan imtaxaanka wadada. Waa inuu kula socdaa darawal shati leh kaasoo haysta shatiga saxda ah ee darawalnimada. Inta lagu jiro bilaha qaboobaha, waa suuragal in xaaladaha cimiladu sababaan in la baajiyo imtaxaankaagii mudeysnaa. Codsadeyaasha loo mudeeyay imtaxaanka wadada maalin uu jiro baraf iyo/ama ceeryaamo ayaa dooran kara in dib loogu dhigo imtaxaanka ayagoo aan qarash kale ka bixin. Codsadeyaasha doorta dookhaan ayaa wici kara (207) 624-9000, raaci 52119.
- Qof ka yar 18 sano kaasoo la siiyay shatiga darawalka ee Maine ayaan: wadi karin gaari asagoo isticmaalaaya taleefanka gacanta ama aaladaha elektarooniga ah ee gacanta lagu qabto; ma wadi karaan gaari inta u dhexeysa saacadaha 12 a.m. iyo 5 a.m.; ma qaadi karaan rakaab ilaa inuu la socdo maahee darawal shati haysta kaasoo haystay shatiga 2 sano, jira ugu yaraan 20 sano, fadhiga kursiga ku xiga darawalka uuna ruqsad u haysto heerka gaariga uu wadaayo darawalku. Xubinta qoyska u dhow ayaa laga wadaa awoowe/ayeeyo, xaaska ayeeyo/awoowe, waalidka, xaaska waalidka, walaale, wiilka xaaska waalidka, walaaley, walaasha xaaska waalidka, ilmaha, ilmaha xaaskaaga, xaaskaaga, xubnaha qoyska guud ee dadka mudada dheer isla joogeen iyo marka uu la nool yahay xubnaha qoyska ee u dhow, masuuliyiinta maxkamadu amartay ee ehelada u dhow iyo ilmaha waalidkiis u baxeen hawlgal milatari kuna jira masuuliyada xubin qoyskiisa kamid ah.

**Xadidaadahaan ayaa shaqeynaaya muddo 270 maalmood ah laga bilaabo marka qofku ku baaso imtaxaanka wadada. Jebin kasta oo ka dhan ah shuruudaha xadidaadahaan ayaa keenaysa joojinta shatiga iyo kordhinta 270 maalmood oo lagu kordhiyo xadidaadaha taasoo gaari karta ilaa qofku dhaafi dhalashada 18aad.**

Shatiga koobaad ee la siiyo codsade kayar 21 sano waa mid **ku meel gaar ah** muddo labo sano ah laakiin keliya hal sano ayuu u shaqeynayaa dadka jira ugu yaraan 21 sano ama ka wayn marka ay helayaan shatiga koobaad. Haddii qof lagu xukumo jebinta sharciga isku socodka kaasoo dhacay intii lagu jiray shatiga ku meel gaarka ah, shatiga ayaa laga xayiri doonaa 30 maalmood. Jebinta shuruudaha marka labaad iyo sadexaad ayaa keenaysa ganaaxyo adag.

**Maxaa ku Jiri doona Imtaxaanaadka?**

- Imtaxaanka qoran ayaa lagu tijaabshaa fahanka iyo aqoonta sharciyada, xeerarka wadooyinka, xirfadaha gaari wadista iyo maamulida gaariga, iyo sidoo kale awoodaada aqoonsiga iyo fahanka calaamadaha wadada wayn. Awood gaar ah ayaa la saarayaa fahanka sharciyada khamri cabista iyo gaari wadista ee Maine.
- Baaritaanka aragga ayaa lagu tijaabin doonaa aragti wanaagga (faseexada aragaaga) iyo aragtida durugsan (fogaanta aad wax ka arki karto abada gees marka aad horey eegayso).

- Inta lagu jiro imtaxaanka wadada ee rasmiga ah Qiimeeye ayaa markasta qiimeyn doona awoodaada xakamaynta maamulka gaarigaaga. Xakamaynta saxda ah waa in la joogteeyaa marka aad gaariga u wado horey ama gadaal, aad u leexanayso bidix ama midig, ama aad toos u wadayso. Waxaa sidoo kale lagugu qiimeyn doonaa sida aad ula socoto aadna uga falceliso darawallada kale iyo dadka lugaynaaya, iyo sidoo kale samaafareyaasha, digniinaha, iyo xaaladaha wadada. Lagaama codsan doono inaad samayso wax qayru caadi ah ama sharci daro ah.

**Fiiro gaar ah: Imtaxaanka wadada lagaama qaadi doono ilaa dhammaan imtaxaannada kale si guul leh loogu baaso.**

### Yay Qasab tahay Inuu Galo Imtaxaannada?

- Dadka codsanaaya shatiga koobaad waa inay galaan dhammaan imtaxaannaadka.
- Qof kasta oo badelaaya noociisa shatiga waa inuu galaa dhammaan imtaxaanaadka qasabka ah. Imtaxaanaad gaar ah ayaa la siiyaa dadka doonaaya inay wadaan mooto, bas, ama baska dugsiga, ayidaado dheeri ah waa in lagu daraa shati kadib marka qofku dhamaysto si guul leh dhammaan imtaxaanaadka quseeya ee qoran iyo kuwa aragga.
- Codsadeyaasha haysta shatiga saxda ah ee ka baxsan dugsiga ayaa laga dhaafi karaa imtaxaanka qoran iyo imtaxaanka wadada.

## Shati Gobal Kale Bixiyay ama Gaari Ku Wadista Shati horey u Jirtay

### Fariin ku socota Dadka U wareegsanaaya Shatigooda Gobalka Kale Shatiga Darawalnimada Ganacsiga aan Ganacskiga ahayn ee Maine

- Waa inaad jirtaa ugu yaraan 16 sano si aad u codsato shatiga Maine.
- Haddii aad jirto 16 ama 17 aadna haysato shatiga saxda ah ee ka baxsan gobalka, waxaa lagaa doonayaa inaad keento cadeynta ah inaad dhamaysatay koorsada waxbarashada darawalka ee la ogolaaday kahor inta aan lagu siin Shatiga Maine.
- Shati kasta oo ka baxsan gobalka waa in la keena amarka la bixinaayo shatiga Maine.
- Waa inaad codsataa Shatiga darawalnimada ee gaadiidka Ganacsiga haddii aad dooneyso inaad wado:
    - Gaariyaasha kaladuwan ee leh miisanaka guud oo dhan 26,001 ama xajmi intaas ka culus, haddii la xaqiijiyo in miisanaka guud ama cabirka miisaanka gaariyaasha la jiidanaayo uu ka badan yahay 10,000 oo rodol.
    - Hal gaari oo matoor ku shaqeeya oo leh cabirka miisanaka gaariga oo dhan 26,001 rodol ama ka badan ama gaari noocaas ah oo qaadaaya gaari leh miisaanka guud ee gaariga oo aan ka badnayn 10,000 oo rodol.
    - Gaari qaadaaya maadooyin khatar ah oo dhan xajmi u baahan in la gasho xeerka DOT ee federaalka.
    - Gaari loo sameeyay inuu qaado in ka badan 15 rakaab ah uuna ku jiro darawalku.
- Imtaxaanka qoran ayaan loo baahnayn haddii aad codsanayso shatiga gaariga dadka qaada.
- Sheegasho kasta oo khaldan oo lagu sheego codsiga shatiga ayaa keenaysa in si degdeg ah lagaagala laabto shatigaaga iyo xaqa aad u leedahay aad gaari ku wado Gobolka Maine. Waxaa intaas dheer, dacwad maxkamadeed ayaa lagaa keeni karaa marka aad wax been abuurto.
- Xoghayaha Gobalka waa inuusan aqbalin codsiga ilmo yar oo kayar 18 sano si uu u qaato shatiga darawalka ama ruqsada casharka ilaa inuu saxiixo maahee waalidka ama masuulka sharciga ah ee

leh masuuliyada ilmaha ama xaaska qofka aan qaan gaarin marka la xaqiijiyo in xaaskiisu jiro 18 ama ka wayn. Qof kasta oo saxiixay codsiga qof aan qaan gaarin oo soo gudbinaaya codsiga darawalka ama ruqsada ardaya ayaa markaas u gudbinaaya waaxda codsiga qoran ee nootaayada leh oo sheegaaya in shatiga ama ruqsada ardayga ee la siiyay qofkaas aan qaan gaarin, la ogolaado, in la joojiyo.

- Waxaad masuul ka tahay ku dhaqanka Sharciyada Gaadiidka ee Maine waana qasab inaad taqaanaa Tusmada Shatiga darawalnimada ee Maine.

## Cusboonaysiinta Shatiga Darawalnimada

### Xog ku Saabsan Shatigaaga Darawalnimada ee Maine

Marka aad ku baasto imtaxaanaadka qasabka ah, waxaad iibsan kartaa shati sawir leh kaasoo shaqeynaaya ilaa dhalashadaada lixdanaad kadib marka lagu siiyo shatiga ama dhalashadaada afraad kadib taariikhda lagu siiyay shatiga haddii aad jirto 65 ama ka wayn tahay. *Waa inaad keentaa cadeynta joogitaanka sharciga ah iyo sharciyada daganaanshaha marka aad codsanayso shatiga sawirka leh.* Haddii aad ka yar tahay 18 sano, waa inaad keentaa waalid ama masuulka sharciga ah oo kula socda si uu kuugu saxiixo bixinta shatiga sawirka leh, kaasoo boostada laguugu soo diri doono kadib marka la sameeyo. Waa inaad sidataa shatigaaga mar kasta oo aad gaari wadayso. Waa inaad tustaa shatigaaga sarkaal kasta oo booliiska ah oo kaa dalbada inaad tusto. Waa sharci daro inaad shatigaaga siiso qof kale.

***Wax ka Badelka Shatiga***: Badelida xogta ku qoran ruqsada darawalka ayaa keenaysa ganaaxyo aad u daran oo ay ku jiri karaan luminta shatigaaga.

***Shatiga Lumay***: Haddii shatigaagu lumo ama uu burburo waa inaad u soo sheegtaa Laanta Gaadiidka aadna codsataa nuqulka badelka ah ee shatiga. Marka la wargasho, Laanta ayaa xogta iyo agabka loo baahan yahay kuu soo diraysa si aad u codsato loogana shaqeeyo bixinta shati badel ah.

***Dib U cusbooneysiinta Shatigaaga Darawalnimada****:* Ku dhawaad 45 maalmood kahor marka shatiga darawalku dhaco, ogeysiiska cusbooneysiinta ayaa boosta loogu diri doonaa ciwaankii ugu danbeeyay ee darawalka ugu qoran galka Laanta Gaadiidka. Haddii aadan noo soo sheegin wax isbadelka ciwaanka ah, waxaa laga yaabaa inaadan helin ogeysiiska cusbooneysiinta. Waa sharci daro inaad gaari ku wado shati dhacay.

***Isbadelka Magaca ama Ciwaanka****:* Haddii magacaaga ama ciwaanku iska badelo kan ku qoran shatigaaga, sharciga Maine ayaa kaa doonaaya inaad u sheegto Xafiiska Gaadiidka 30 maalmood gudahood kadib isbadelka.

## Luminta Xuquuqaha Gaari Wadista

### Ilaalinta Shatigaaga Darawalnimada

Xasuusnoow, inaad hasato shati darawalnimo waa xuquuq lagaa ceshan karo markii la doono haddii aadan masuuliyad daro ku kacdo.

**Awooda Xoghayaha Gobalka**

Xoghayaha Gobalka ayaa awood u leh inuu xanibaado saaro shatigaaga darawalka marka uu muhiim u arko. Mid kamid ah xanibaabadaha ugu badan waa shardiga ah in shatiilaha xirta ookiyaalaha aragga saxa uu gashto marka uu gaariga wado. Xadidaadaha ayaa qabanaaya wakhtiga maalinta iyo goobta gaariga lagu wadaayo gaariga. Gaari wadis kasoo horjeeda xadidaadaha waa sharci daro.

Xoghayaha Gobalka ayaa kaa dalban kara inaad u timaado imtaxaanka shatiga ama dhageysi marka uu doono, xataa haddii lagu siiyay shatiga darawalnimada. Xoghayaha ayaa sidoo kale kaa dooni kara inaad keento cadeyn ka timid dhakhtarkaaga oo qusaysa xaaladaada caafimaadka jirka ama dhimirka.

Xoghayaha Gobalka ayaa awood u leh inuu laalo shatigaaga marka uu helo warbixinta qoran ee xun ee qusaysa gaari wadistaada uuna ka helo booliiska ama xubin kale oo kamid ah dadwaynaha.

**Laalista Shatiga ama Ruqsada Qofka aan Qaan gaarin**

Qof kasta oo saxiixay codsiga qof aan qaan gaarin ee codanaaya shatiga darawalka ama ogolaanshaha casharka ayaa, intaas kadib, u gudbin kara, Xoghayaha Gobalka, codsiga qoraaka ah ee nootaayada leh kaasoo codsanaaya in shatiga ama ruqsada casharka ee qofka aan qaan gaarin la laalo.

**Ganaaxyada iyo Laalista Shatiga**

Xoghayaha Gobalka iyo maxkamadaha ayaa awood wayn u leh laalista shatigaaga darawalnimada. Gaari wadistu waa xuquuq gaar ah, waxaana haysan kara xuquuqdaas keliya kuwa muujiya inay yihiin kuwo badqab leh.

**Shatigaaga Darawalnimada ayaa Lagaa Ceshan karaa ayadoo La Burinaayo ama La Laalaayo**

*La noqoshada:* Inkastoo aan badanaa la adeegsan, waxaa laga wadaa in shatigaaga iyo xuquuqdaada darawalnimada si rasmi ah loo baabi'yay aadna u baahan doonto inaad codsato shati cusub marka mudada la laabashadu dhammaato.

Khaladaadka caadiyan keena shati la noqoshada ayaa ah:

- Ku gaysashada gaari dil aan loo meel dayin. La noqosho soconaysa ugu yaraan 5 sano. Haddii khamri ku jiro kiiska la noqoshadu wa amid abadiyan ah.
- Qof Danbi Caadeystay La noqosho soconaysa ugu yaraan hal sano.

*Laalista:* Laalisyada ayaa muddo ku meel gaar ah xayiraaya xuquuqda gaari wadista. Qof shatigiisa la laalay ayaan loo ogolaan doonin inuu gaari wado ilaa ogeysiis qoran oo u fasaxaaya uu helo.

Khaladaadka caadiyan keena shati laalista ayaa ah:

- Ku fashilmida soo gudbinta caymiska lagaa rabo.
- Ku fashilmida soo xaadirista maxkamada kadib markii dacwad taraafig lagaa gudbiyay.
- Sarqaansanimo Ku Wadida Gaari (O.U.I.).
- Laalista Shatiga ee Maamulka Sameeyo.

**Laalista Shatiga Maamulka Sameeyo**

Xeerarka laalista Shatiga ee Maamulka Sameeyo ee quseeya uruurinta dhibcaha ganaaxyada, xukunnada iyo dacwadaha ayaa ah qaabka ugu badan ee loo adeegsado xakamaynta habdhaqanka darawalka ee gudaha Maine.

**Muddooyinka Laalinta ee Xukunnada la Go'aanshay**

Shatiga ama xuquuqda gaari wadista ee qof kasta oo lagu eedeeyay la dagaalanka booliiska, baasida jidgooyada ciidanka ama gaari ku cayrinta wadada ayaa shatiga laga laali karaa muddo 90 maalmood ah.

Qof kasta oo lagu xukumo danbiga ah inuu gaari kaxeeyay kadib markii shatigiisa la laalay ayaa laga laali karaa shatigiisa muddo 60 mood ah.

Shaqsiyaadka lagu xkumo danbiyada soo socda ayaa shatiyadooda la laali karaa muddo 30 maalmood ah:

- Ku fashilmida u istaagida sarkaal booliis ah
- Ka tagista goobta shilka (dhaawac jireed)
- Gaari ku wadista keligiis ruqsad
- Gaari wadista bilaa ruqsad aah (fal danbiyeed)
- Baasida baska dugsiga oo taagan oo nalalkiisa cas falaash bixinayaan.
- Xawaaraynta in ka badan 30 mayl saacadii ama ka badan xadiga xawaaraha
- Wax ka badelka shatiga ama shahaadada diiwaan gelinta
- Amaahinta shatiga cid kale
- U isticmaalida shatiga sifo sharci daro ah
- Soo bandhigta shati la laalay
- Ka been sheegida codsiga diiwaan gelinta ama shatiga
- Siinta xog been ah booliiska

**Adeegsiga Aqoonsi Been Abuur si aad U hesho Khamri**

Sharciga ayaa ka doonaaya maxkamad inay laasho shatiga darawalka ee qof kasta, oo aan wali gaarin 21 sano, kaasoo lagu xukumay danbiga ah inuu adeegsaday aqoonsiyo been abuur ah ama khiyaano ah si uu u helo khamri ama u galo xarunta khamriga laga cabo. Maxkamadu waxay awood madax banaan u leedahay inay shatiga laasho 30 maalmood khaladka koobaad waxaana laga doonayaa inay shatiga laasho 90 maalmood khaladka labaad iyo hal sano khalad kasta oo ku xiga. Xoghayaha Gobalka ayaa masuul ka ha inuu laalo shatiyada marka qofku galo khaladka labaad iyo khaladaadka ku xiga. Khaladku wuxuu keenayaa lix dhibcaha ganaaxa ah

**Laalista loo Cuskado Iskudarka Dhibcaha Ganaaxa: Nidaamka Dhibcaha ee Maine**

Sida sharcigu amraayo, Xoghayaha Gobalka ayaa laga doonayaa inuu dhaqan gasho xeerar abuuraaya nidaam guud oo lagu bixiyo dhibcaha ganaaxa ee shaqsiyaadka lagu xukumo danbiyada qaar ee gaadiidka.

Marka la gaaro dhibcaha heer gaar ah (oo hadda ah 6 dhibcood), digniin ayuu soo saarayaa Xoghayaha Gobalka, haddii wadarta guud ee dhibcuhuna gaaraan 12 dhibcood ama ka badan shatiga darawalka ayaa la laali doonaa. Dhibcaha ayaa laga tiri doonaa diiwaanka darawalka marka ay gaaraan hal sano.

Marka laalis la sameeyo, darawaka ayaa xaq u leh inuu dhageysto Xafiiska Xoghayaha Gobalka. Qiimeeyaha dhageysiga ayaa sii wadi kara, wax ka badeli kara, ama baabi'in kara talaabada hore ee la xukumay. Qofka shatigiisa la laalay waxaa matali kara qareen ku matalaaya dhageysiguu doono go'aanka dhagaysigana waxaa racfaan looga qaadan karaa Maxkamada Sare.

**Ka cararista Booliiska**

Ka cararista sarkaalka booliiska waa danbi wayn. Qof kasta, kadib marka laga codsado ama loogu baaqo inuu istaago, oo iskudaya inuu ka cararo ciidanka booliiska asagoo gaariga ku wadaaya xawaare axmaqnimo ah, taasoo keenaysa cayrsiga xawaaraha dheereeya ee u dhexeeya darawalka gaariga iyo booliiska oo ay u shidan yihiin nalka buluuga ah iyo seeriga, waa danbi Heerka C ah. Haddii uu qof kasoo gaaro dhaawac xun oo jireed sabab la xiriirta iskudayga darawalka ee ka cararida booliiska, darawakaas ayaa geli kara danbiga Heerka B.

**Ka tagista Goobta Shilka**

Kordhinta nooca danbiga ka tagista goobta shilka ee uu ka dhacay dhaawaca jireed oo lasoo qaado Heerka D lana gaarsiiyo danbiga Heerka C, haddii shilku keenay dhaawac daran oo jireed ama geeri qofkuna uu si kas ah, asagoo og ama si axmaqnimo ah ugu fashilmo inuu joogsado goobta shilku ka dhacay.

**Abaal marinta Xadgudub La'aanta**

Nidaamka abaal marinta xadgudub la'aanta ayaa siiya hal dhibic sanad kasta taasoo qofka ka afinaysa xukunnada ama laalisyada shatiga. Qofka ayaa xaq u leh inuu helo wadarta guud ee afar dhibcood oo ka cafinaaya xeer jebinta.

**Sii wadista Waxbarashada Darawalka**

Koorsada Isbadellada Darawalnimada ee Maine waa barnaamij shan saacadood ah oo la ogolaaday kaasoo loo sameeyay in lagu kordhiyo aqoonta khataraha gaari wadista iyo farsamooyinka iska ilaalinta khatarahaan. Diirada ayaa la saarayaa kahortaga isku dhacyada ayadoo ay jiraan xaaladaha daran iyo falalka amni darada ah ee darawalada kale. Koorsadu waxay sidoo kale diirada saartaa khataraha ka dhasha adeegsiga khamriga iyo daroogooyinka kale ee la xiriira gaari wadista.

Dhamaystirka buuxa ee Koorsada Isbadellada Darawalnimada ee Maine ama koorso kale oo kor u qaadaysa aqoonta darawalka oo la aqoonsan yahay ayaa ka jaraysa sadex dhibcood wadarta guud ee dhibcaha ganaaxa darawalka. Qof kasta ayaa, xataa haddii uusan lahayn khaladaad hore, heli kara cafiska marka uu si buuxda u dhamaysto koorsadaan, laakiin dhibcaha ayaa laga jari doonaa halmar mudada labo iyo tobanka bilood ah.
Koorsooyinka waxaa baxsha macalimiin tababaran markasta iyo meel kasta oo looga baahdo. Koorsooyinka ayaa badanaa qayb ka ah barnaamijka waxbarashada ee dadka waawayn iyo sii wadista ee maxaliga ah. Si aad u hesho xog dheeri ah fadlan ka wac Waaxda Badqabka Wadooyinka Waawayn lambarka (207) 626-3840.

**Laalista 120 Maalmood ah**

Qof kasta oo shatigiisa la laalay sadex jeer sadex sano gudahood uuna laalay Xoghayaha Gobalka ama maxkamad ayaa lagu soo rogi karaa laalis dheeri ah oo dhan muddo ilaa 120 maalmood ah.

**Laalisyada Waajibka ah**

Marka lagu daro awoodaha madaxa banaan ee Xoghayaha Gobalka, waxaa jira qaar kamid ah jebinnada xeerka oo u baahan laalista guud ee waajibka ah oo aan lahayn wax shardi dhaafka aana lahayn dookha shatiga "shaqada". Dhawr ayaa hoos ku qoran (si aad u hesho liiska buuxa, ka eeg M.R.S.A. Title 29-A).

- Ku fashilmida ka jawaabida amarka u yeerista gaariga ee maxkamada ka yimaada. Markasta oo uu qof ku fashilmo inuu yimaado maxkamada maainta loo cayimay, ama uu ku fashilmo inuu bixiyo ganaax kasta oo la saaray, shatiga ayaa la laali doonaa ilaa uu ka yimaado maxkamada ama uu bixiyo ganaaxa.
  Kani waa mid kamid ah sababaha ugu badan ee laalista keena. Ganaayada lacageed waa **qasab** in la dhiibo.
- Gaari wadista adoo sarqaansan, heerka khamriga dhiiga ku jira oo dhan 0.08% ama ka badan, ama diidista soo gudbinta dhiiga si looga baaro khamriga ayaa u baahan shati laalis waajib ah oo leh shuruudo kaladuwan (ka eeg Qaybta ka hadlaysa Khamriga).
- Gaari Wadista Khatarta ah: Laalista muddo dhan 30 maalmood
- Qaadista sharci darada ah, haysashada, ama isticmaalka khariga uu ku isticmaalo qof aan qaan gaarin gudaha gaari: Laalista muddo dhan ugu yaraan 30 maalmood.
- Ku qaadista daroogooyin sharci daro ah oo uu gaari kuq aado qof aan qaan gaarin: Laalista muddo dhan ugu yaraan 30 maalmood.
- Haddii aad masuul ka tahay waxyeelo shil ka dhalatay aadana haysan caymiska qaanta, shatiga iyo diiwaan gelinta waa in la laalaa ilaa looga keenaayo cadeynta caymiska Xoghayaha Gobalka.

**La noqoshada shatiga darawalka danbiyada qaar awgood**

Sharcigaan ayaa ka doonaaya Xoghayaha Gobalka inuu muddo aan a cayimin laalo ruqsadaha darawalnimada ee shaqsiyaadka lagu xukumo inay falal danbiyeedka dhacay marka shaqsiyaadku gaariga u adeegsadeen inay ku galaan danbiga shaqada gaariguna sababtay, ama abuurtay khatarta wayn ama cabsida laga qabo dhaawaca xun ee jireed. Falalka danbiyada ee la xukumay, ayna ku jiraan xukunnada, ay yihiin weerar, weerar daran, weerarka daran ee aadka u sareeya, hanjabaad danbi, iyo fal axmaqnimo ah. Muddooyinka shati la noqoshadu waa sadex sano danbiyada Heerka A, B ama C, labo sano danbiga Heerka D, iyo hal sano danbiga Heerka E.

**Laalisyada kale ee uu Go'aansado Xoghayaha Gobalku**

Shatiga qof kasta oo Xoghayaha Gobalka uu go'aansho inuusan awoodin inuu gaari wado, tusaale, uu qabo naafooyinka xun ee jirka ama dhimirka, ayaa la laali karaa ayadoo aan la samayn dhageysi, marka la xaqiijiyo in Xoghayaha Gobalku helay dhammaan cadeynta la heli karo.

Awoodid la'aanta la xiriirta naafada jirka ama dhimirka ayaa lagu go'aanshaa sida ku cad xeerarka (Cutubka 3 ee Buug-yaraha Haybta Kartida Waxqabad ee Maine, ee la badelay), Kartida Jireed, Shucuureed iyo Mida Dhimirka ee Wadista Gaari.
Qof kasta oo shatigiisa la laalay ayaa codsan kara dhageysi, laakiin laalista ayaa sii soconaysa inta go'aan kasoo baxaayo dhageysiga.

Garsooraha ayaa awood madax banaan u leh laalista shatiga darawalka ee qof lagu helay inuu ku fashilmay bixinta lacagta ganaaxa ah ee dacwad danbiyeed ama madani ah. Garsoore ayaa amri kara laalista shatiga darawalka sababo la xiriira danbiyada aan qusayn wadista gaari.

**Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 1:**

1. Yaa codsi u diri kara Xafiiska Gaadiidka si loo laalo shatiga ama ruqsada casharka ee qof aan qaan gaarin?
2. Qaadista sharci darada ah ee khamriga uu qaado qof aan qaan gaarin ayaa keenaysa laalista shatiga ee ugu yar oo dhan meeqa maalmood?
3. Meeqa nooc oo shatiga darawalka ah ayaa lagu bixiyaa Maine?
4. Waa maxay dhibcaha ganaaxu?
5. Sheeg magaca xadgudubyada ka dhanka ah sharciyada wadooyinka kuwaasoo, marka qofka lagu helo, keenaaya laalista otomaatiga ah ee 90 maalmood ah.

6. Marka loo eego sharciga Maine meeqa maalmood ayaad haysataa si aad ugu soo sheegto BMV isbadelka magaca ama ciwaanka?

# QAYBTA 2
# Sharciga iyo Xeerarka Gobalka

## Mulkiyada iyo Maamulida Gaari

Si lamid ah haysashada shatiga darawalka, mulkiyada gaari ayaa wadata masuuliyado badan. Gaariyaasha ku shaqeeya wadooyinka dadwaynaha ee Maine waa inay leeyihiin diiwaan gelin, caymis, si wanaagsana loo maareeyo.

## SabarloogayntaGaarigaaga

Gaari matoor ku shaqeeya waa inuu leeyahay sabarloogo kahor inta aan laga diiwaan gelin Maine.

**1. Waa maxay sabarloogo?**

Sabarloogadu waa dukumiinti sharci oo cadeynaaya mulkiyada gaariga.

**2. Maxaan ugu baahan nahay sabarloogo?**

Si aad u cadeyso mulkiyada aadna u muujiso daymaha (amaahda) lagu leeyahay gaarigaaga.

**3. Sidee ayaan u codsan karaa sabarloogo?**

Haddii aad gaarigaaga ka iibsatay shirkadaha gaadiidka iibisa oo Maine ku taala, shirkada ayaa ku siinaysa nuqulka buluuga ah ee codsiga sabarloogada kaasoo ay qasab tahay inaad la timaado marka koobaad ee la diiwaan gelinaayo gaariga. Haddii aan gaariga laga iibsan shirkada gaariyaasha iibisa ee Maine, codsiga sabarloogada waa inaad buuxisaa aadna soo raacisaa shahaadada hore ee sabarloogada ama shahaadada shirkada gaariga samaysay ee asalka ah, taasoo si sax ah laguugu wareejiyay.

**4. Yaa la siiyaa sabarloogada?**

Haddii aad tahay mulkiilaha aadana ahayn qof rahan ku haysta waxaad heli doontaa sabarloogada. Haddii aad lacag soo daynsatay si aad ugu bixiso gaariga, bangiga ama shirkada daynta ee lacagta ku deymisay ayaa helaysa sabarloogada.

**5. Xagee ayaa dhigayaa shahaadada sabarloogada?**

Meel amaan ah; marna ha gelin gudaha gaariga

**6. Waa maxay gaariyaasha aan u baahnayn sabarloogo sida ku cad sharciga sabarloogada?**

Gaariyaasha soo baxay kahor sanadkii 1995, mootooyinka leh xajmiga matoorka kayar 300 cc iyo tareeleyaasha leh miisaanka marka ay faaruqa yihiin oo dhan 3,000 oo rodol ama kayar.

**7. Maxaan samaynayaa haddii sabarloogadeyda la xado, ay lunto, burburto, ama halawdo?**

Waa inaad codsataa sabarloogo badel ah halmar. Soo raaci Shahaadadaada Sabarloogada halawday ama burburtay codsiga iyo qarashka lagaa rabo.

**Fiiro gaar ah: Haddii aad qabto wax su'aalo dheeri ah oo quseeya xogtaan sabarloogada, fadlan wac 207-624-9000**

## Diiwaan gelinta Gaarigaaga

Haddii aad leedahay gaari, guri gaari ah, tareelar, ama tareelar yare lagu wado wadooyinka Maine, waa inaad diiwaan gelisaa.

**1. Sidee ayaan gaari uga diiwaan gelinayaa Maine?**

Lacagta canshuurta ee la siinaayo canshuur uruuriyaha magaallada ayaa ah talaabada koobaad ee diiwaan gelinta gaarigaaga. Canshuurta dawlada waa in lga baxshaa dhammaan gaariyaasha marka laga reebo tareelaha yaryar. Cadadka canshuurta lagaa rabo ayaa ku xiran da'da iyo qiimaha warshada ee gaariga la diiwaan gelinaayo. Helista lacagta canshuurta, badelkii, ayaa noqonaaya codsigaaga diiwaan gelinta. Dhabarka danbe ee nuqulka cad ee diiwaan gelinta waa in la buuxshaa lana saxiixaa kahor inta aan diiwaan gelinta la bixinta. Haddii aad ka yar tahay 18 sano waalid ama masuul waa inuu sidoo kale saxiixaa foomka diiwaan gelinta.

**2. Xagee ayaa diiwaan gelinta gaariga lagu baxshaa?**

Kadib marka aad dhiibto canshuurta, diiwaan gelintaada iyo taargooyinka ayaad heli kartaa adoo booqanaaya Xafiisyada Laanta Gaadiidka oo ku qoran gudaha jaldiga buug yarahaan ama adoo codsigaaga iyo qarashka saxda ah boostada ugu diraaya Bureau of Motor Vehicles, 29 State House Station, Augusta, Maine 04333. Inta badan maamulada magaallada ee Maine ayaa bixiya sidoo kale diiwaan gelinnada iyo taargooyinka. Waydii maamulka magaaladaada si aad u ogaato haddii ay ka qaybgalaan barnaamijka wakiilka magaallada ee gobalka.

**3. Waa meeqa qiimaha diiwaan gelinta gaari?**

Qarashka diiwaan gelinta gaariga rakaabku waa $35.00. Diiwaan gelinta ayaa shaqeynaysa hal sano laga bilaabo bisha la bixiyay. Qarashka taraagyada yaryar ee leh ugu badnaan miisaanka gaariga oo dhan 6,000 rodol ayaa sidoo kale ah $35.00. Qiimaha diiwaan gelinta taraagyada waawayn ayaa kordhaysa marka miisaanka guud ee gaarigu kordho.

**4. Miyaan u baahan nahay inaan codsado sabarloogada Maine si aan isku diiwaan gasho?**

Diiwaan gelinta koobaad, codsiga sabarloogada waa in loo soo gudbiyaa gaariga soo baxay 1995 ama kadib.

**5. Ma qasab baa in la baxsho lacagta canshuurta iibka?**

Marka aad gaari ka diiwaan gelinayso markii koobaad Maine codsigaaga diiwaan gelinta waa inaad soo raacisaa "Cadeynta Canshuurta Adeegsiga". Foomkaan waxaa loo adeegsadaa in lagu go'aansho haddii lagugu leeyahay wax canshuuraha iibka ee Maine ah. Canshuur kasta oo iibka ah oo lagugu leeyahay waa inaad bixisaa xiliga diiwaan gelinta. Foomamkaan ayaa laga soo qaadan karaa Xafiiska Laanta Gaadiidka

ama waaxda canshuuraha ee magaallada. Haddii gaariga la diiwaan gelinaayo aad ka iibsatay shirkadaha gaadiidka iibisa oo Maine ku taala, shirkada ayaa ku siinaysa foomka canshuurta iibka, kaasoo ay qasab tahay inaad la timaado koobaad ee la diiwaan gelinaayo gaariga. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo quseeya canshuurta iibka ama adeegsiga, waa inaad la xiriirto Waaxda Canshuurta Iibka ee Adeegga Canhuuraha ee Maine oo aad ka wacayso 207-287-2336.

**6. Muddo intee dhan kadib marka aan u guuro Maine ayay tahay inaan diiwaan gasho gaarigayga?**

Sharciga Maine ayaa qasab ka dhigaaya in diiwaan gelinta gaariga ee Maine ay qasab tahay in la codsado 30 maalmood gudahood marka daganaanshaha gobalka Maine la shaaciyo lana xaqiijiyo.

## Caymis U samaynta Gaarigaaga

Sharciga Maine ayaa ka doonaaya mulkiilaha iyo darawal kasta oo wada gaari inuu lahaado caymiska qaanta gaariga uuna tuso cadeyntiisa marka uu ka codsado sarkaalka booliiska ah. Gaari kasta oo aad wado in uu caymis leeyahay xataa haddii aadan ahayn mulkiilaha. Sidaas awgeed, waa inaad xaqiijisaa aadna sidataa cadeynta caymiska oo ku jirta gaariga. Sharciga Maine ayaa sidoo kale ka doonaaya gaarileeyda Maine inay keenaan cadeynta caymiska marka aad diiwaan gelinayso gaariga.

Noocyada la aqbali karo ee cadeynta caymiska waxaa kamid ah: kaarka caymiska gaariga, waraaq kasoo baxday shirkada caymiska ama wakaalad oo muujinaysa in gaariga uu caymiska qaanta haysto, heshiis caymis ama xeerka caymiska kaasoo leh dukumiintiga khulaasada oo qeexaysa gaariga caymiska leh, magaca qofka caymiska ku qoran, cadadka caymiska (waa inuu buuxiyaa shuruudaha ugu yar ee qaanta Maine), nooca caymiska iyo mudada gaarigu caymiska helaayo (taariikhaha biloowga iyo dhammaadka) loona diraa wakiilka magaallada ama Waaxda Gaadiidka.

Ku fashilmida soo saarida cadeynta caymiska marka lagaa rabo ayaa keeni karta in ganaaxa caymis la'aanta iyo laalista shatiga iyo diiwaan gelinta gaariga. Haddii lagugu xukumo ku fashilmida keenista cadeynta caymiska, waxaa lagaa doonayaa inaad keento cadeynta masuuliyada dhaqaalaha oo aad ku cadeynayso shahaadada caymiska ee SR-22 ama waxaad waajihi doontaa laalista shatigaaga iyo diiwaan gelintaada. Waa danbi inaad keento cadeynta caymiska oo been abuur ah ama wax laga badelay.

Haddii darawal aan caymis haysan gaysto dhaawac ama burbur hantiyeed oo dhan $1000 ama ka badan, ma wadi karo gaari ilaa uu ka keeno cadeynta masuuliyada dhaqaalaha ama caymiska saxda ah uu keeno. Waxaa intaas dheer, haddii xukun maxkamadeed lasoo saaro, xuquuqaha darawalnimada iyo diiwaan gelinta ayaa la laali doonaa ilaa xukunka noocaas ah la fuliyo.

***Caymiska Darawalka Caymiska leh:*** Sida sharcigu qabo, dhammaan xeerarka qaanta ee gaariyaasha ee ku qoran gobalka Maine waxaa kamid ah caymiska "darawalka aan caymiska lahayn." Tan ayaa ka difaacayda sheegashooyinka waxyeelooyinka dhaawaca jirka oo dhan ilaa xadiyada ku cad Sharciga Masuuliyada Dhaqaalaha ee Maine oo leh dookha xadiga sareeya.

***Caymiska Sharcigu faray:*** Qofka aan awoodin inuu caymis ka iibsado shirkadaha caadiga ah sabab kasta oo ka danbaysaba ayaa caymiska ka heli kara qorshaha caymiska Gaariyaasha ee Maine. Dhammaan shirkadaha caymiska ee iibiya caymiska gaariyaasha gudaha Maine ayuu sharcigu ka doonayaa, inay ka qaybgalaan suuqaan wadaaga ah.

## Baarista Gaarigaaga

Dhammaan gaariyaasha ka diiwaan gashan Maine waa inay maraan baarista hadda ee Maine kahor inta aan lagu wadin wadooyinka dadwaynaha. Baadhitaanadaan waa in lagu sameeyaa xarunta baadhista rasmiga ah halmar sanadkii. Waydii midkood xarumahaan wixii faahfaahin ah. Ku fashilmida helista astaanta baadhista ee hadda ayaa ka dhignaan karta ganaax iyo inaad dhibco ka lumiso shatigaaga hadda ee darawalka. Mootooyinku waa inay leeyihiin astaanta saxda ah ee baadhista. Sarkaal booliis ah ayaa samayn kara baadhista badqabka gaariga marka uu doono. Xaqiiqdii, Maine ayaa mararka qaar adeegsata jidgooyooyin sharci ah si ujeedadaas loo fuliyo.

**Fiiro gaar ah: Baaritaanka badqabka gaariga ayaa sidoo kale qayb ka ah imtaxaanka darawalka. Natiijooyinka imtaxaanka ayaan la bixin doonin haddii gaariyaashu aysan buuxin shuruudaha caadiga ah ee imtaxaanka, ama haddii wax kamid ah albaabadu aysan shaqeynayn, kuraasto aysan si amaan ah ugu dhaganayn sagxada gaariga, ama haddii aaga wax la gashto ee shirku uusan si sax ah ugu dhaganayn goobtiisa.**

Kuwaani waa qaybaha ugu waawayn kuwaasoo qayb ka ah imtaxaanka kaasoo qasab ah inuu buuxsho shuruudaha baarista ee Gobalka kahor inta aan gaarigaagu ku baasin baaritaanka:

- **Lambarka Aqoonsiga Baabuurka** - (VIN) VIN ka waa in aan la badelin, laga furin, ama laga qarin meelaha loo jeedo.
- **Muraayada Gadaal Qabata ee Gaariga** - waa inaysan jabnayn, burburin, wasaqaysnayn ama lahyn afaf jaban.
- **Hoonka** - waa inuu yahay mid leh dhawaaq ku filan in la maqlo meel u jirta 200 oo fiid.
- **Nadiifiyaha Muraayada hore** - Nadiifiyaashu waa inay si wanaagsan u shaqeynayaan
- **Baraf Bi'iyaha** - Marwaxadu waa inay shaqeynaysaa aalada barafka bi'isana waa inay hawo kulul ku shubtaa muraajada difaaca hore.
- **Tilmaamaha leexashada, nalalka hore, nalalka danbe, nalalka joogsiga, iyo nalka taargada** - Dhammaan nalalku waa inay si sax ah u shaqeynayaan, dhammaan bikaacyaduna waa inay leeyihiin midabka iyo qaabka saxda ah.
- **Bareegyada** - Gaarigaagu waa inuu leeyahay bareegga hore iyo bareegga baakinka. Bareegga hore wa ainuu gaariga joojin karaan 30 fiid gudahood marka gaarigu uu ku socdo 20 mayl saacadii. Bareega baakinku waa inuu gaariga ku hayn kara meel taag ah.
- **Muraayada Hore iyo Daaqadaha** - Waa inaysan jabnayn, burburin, caad fuulin, ama wax isku gudbin.
- **Isteerinka iyo Qaybta Hore** - Qaybuhu waa inay u shaqeynayaan si sax ah aysana waxyeelaysnayn.
- **Nidaamka Qiiq saarka** - Dhammaan qaybuhu waa inaysan lahayn duleello, dilaacyo waana inaysan samayn guux xad dhaaf ah.
- **Nidaamka Shidaalka** - Dhammaan qaybunuhu waa inaysan lahayn duleello iyo dilaacyo.
- **Taayirada** - Waa inay leeyihiin 2/32 inji oo jilfaxda taayirada ah aysana lahayn googo', jeexdimo, ama xaalado kale oo khatar ah. Gaariyaasha ganacsiga ee leh miisaanka dhan 10,000 rodol G.V.W., 4/32 inji oo taayir ah ayay u baahan yihiin.
- **Taargooyinka Gaariga** - Dhammaan taargooyinka la abxshay waa in lagu dhajiyaa gaariga si fududna loo akhrin karo.
- **Buudiga ama Oogada** - Dhammaan qaybuhu waa inay jirana ayna ka caagan yihiin wasaqda, geesaha jeexan, ama ciladaha kale.
- **Xawaare Beegaha** - Waa inuu si sax ah u shaqeynayaa waana inaan la qujayn ama wax laga badelin.
- **Dhuunta Shidaalka** - Waa inaan la badelin sinaba.
- **Mariid bi'iye** - Waa in si sax ah loo rakibaa aana la badelin sinaba.

## Ilaalinta Gaarigaaga

Xaqiijinta in gaarigaagu uu si wanaagsan u shaqeynaayo ayaa kaa caawin karta inaad iska ilaaliso shil ama burbur. Gaari caafimaad qaba ayaa ku siin kara heerka badqabka dheeriga ah marka aad u baahan tahay.

Inkastoo aad u baahan karto makaanig si loo bixiyo cilada, waxaad samayn kartaa hubinta badqabka si iskaa ah.

### Ilaalinta Gaariga

Hubi xaalada qaybaha soo socda mar kasta oo aad gaari wadayso:

- **Nalalka Hore** - Badel guluubyada gubtay oo wasaqda ka tirtir dhalooyinka nalalka ee yareyn kara aragaaga habaynkii nus.
- **Nalalka Tilmaamaha iyo Bareegga** - Badel guluubyada iyo fiyuusyada marka loo baahdo. Haddii aan nalalkaani si sax ah u shaqeynayn ma awoodi doontid inaad tilmaan siiso darawallada kale.
- **Daaqadaha iyo Muraayada Hore** - Nadiifi muraayada, gudaha, iyo banaanka, si aad u yareyso caadka aadna u hubiso aragga wanaagsan.
- **Taayirada** - Raadi astaamaha taayirka jeexmay oo hubi aariyada taayirada marka taayiradu "qabowyihiin" (kahor inta aadan masaafo dheer socon). Haddii taayiradaadu aysan si wanaagsan u shaqeynayn, waxaa yaraan doonta awoodaada maamulka, waxaad isticmaalaysaa gaas dheeraad ah waxaadna khatar ugu jirtaa in taayirku qarxo.
- **Bareegyada** - Hubi in sheelaradu si wanaagsan uga sarayso sagxada marka aad ku istaagto. Dhageyso jajabka iyo sharqanta oo hubi in gaarigu qaadaayo hal gees marka aad bareegga qabato.
- **Isteerinka** - Haddii giraangirta isteerinkaagu leexato labo inji ama ka badan asagoo aan gaarigu dhaqaaqin waxay noqon karta mid dabacday mana awoodin doontid inaad gaariga degdeg u leexiso si aad u gelin shil.
- **Nadiifiyaasha Muraayadaha Hore** - Hubi afka hore ee nadiifiyaha inuu murxay si uusan u xoqin muraayada hore. Biyo ka buuxi jubada muraayada hore oo adeegso dareere leh maadada kahortagta barafka xiliga qaboobaha. Haddii aan qaybahaan si sax ah u shaqeynayn, aragaaga ayaa aad u koobnaan doona.
- **Nidaamka Qiiq saarka** - Haddii aad maqasho dhawaaqyo dhaadheer jabaq ama aad aragto daxal saaran guux caburiyaha ama tuubada qiiqa gaariga, waa in uu nidaamkaaga qiiqa saara uu baaraa makanig. Guux caburiye diaacsan ayaa si khaldan u soo saaraaya uuro sun ah. Kaarboon monoxide waa gaas dilaa ah, oo aan ur lahayn kuwa jira qiiqa dhammaan matoorada gaaska ku shaqeeya kaasoo sababa daal, madax xanuun, dawakhsanaan, lalabo iyo dhago dhawaaq. Liqista mudada dheer ee kaarboon monoxide ka ayaa loo dhiman karaa.
- **Qiiqa Baabuurka** - Qofku kuma wadi karo gaari ku shaqeeya gaas wadada dadwaynaha haddii gaarigu sii daynaayo uuro muuqata, oo ahayn uumiga biyaha, oo kasoo baxaaya aaga qiiq saarka muddo ka badan 5 sikin oo xiriir ah.
- **Beegeyaasha** - Xaqiiji in dhammaan beegeyaashaadu ay si wanaagsan u shaqeynayaan. Kuwaan ayaa ku xasuusin kara jirintaanka dhibaatooyin xunxun oo ka jira gaarigaaga, sida kulayl xad dhaaf ah ama luminta cadaadiska shidaalka.
- **Laalista** - Hoos u riix qaybta hore iyo qaybta danbe ee gaarigaaga. Haddii uu bood-boodo in ka badan labo jeer, waxaad u baahan kartaa kaabaano cusub. Marka kaabaanadu jabaan waxaad dhib ku qabi kartaa ku socoshada hal layn marka aad gaariga ku wadayso wadooyinka leex-leexda.

Si joogto ah, waa inaad u hubisaa ama qof baara u gaysaa:

- Heerka shidaalka
- Qaboojilaha matoorka
- Saliida gaariga
- Heerka saliida bareega
- Adkaanta iyo dilaaca suunka marwaxada.

Ku xafidida gaarigaaga oolyo badelid joogto ah (mar kasta oo aad socoto 3,000 - 5,000 oo mayl) iyo cilad bixinta matoorka ee muddaba mar ah ayaa kahortagaysa ciladaha badan ee ku dhaca gaariyaasha sidoo kalena kor u qaadaysa shaqada gaarigaaga.

## Qalabka iyo Agabka

Waxaa lagu talinayaa inaad gaarigaaga ku qlabayso agabka soo socda marka shil ama xaalad degdeg ah timaado:

- Buugga mulkiilaha
- Taayir isbeer ah
- Giriig
- Baanad
- Kiishada gurmadka degdeg ah
- Buste
- Toosh
- Qariirada wadooyinka

## Dhawaaqa xad dhaafka ah ee Nidaamka Guuxa

Qofku kuma wadi karo qalabka codka oo saaran gaari wadada dadwaynaha kaasoo leh dhawaaq laga maqli karo meel ka fog 25 fiid kana badan 85 disibeel ama ka badan inta macquulka ah ayadoo loo eegaayo meesha gaarigu maraayo iyo saamaynta uu ku leeyahay dadka u dhow gaariga. Jebinta sharcigaan waa jebinta sharciga wadada waxaana lagugu ganaaxayaa $50 khaladka koobaad, $100 khaladka 2aad iyo $150 khaladka 3aad ama khaladaadka xiga.

## Su'aalaha Muraajacada ah ee Qaybta 2:

1. Waa maxay sabarloogo sidee ayaadse u codsanaysaa?
2. Intee ayay tahay inaan baaro gaarigayga?
3. Waa maxay canshuurta qasabka ah kahor diiwaan gelinta gaari?
4. Miyaan u baahan doonaa caymiska qaanta marka aan diiwaan gelinaayo gaarigayga?
5. Xagee iyo sidee ayaan u diiwaan gelinayaa gaarigayga?
6. Waa maxay qaar kamid ah agabka xaaladaha degdeg ah ee ay tahay inaan ku haysto gaarigayga markasta?

# QAYBTA 3
# Diyaar u ah Gaari Wadis

Gaari wadistu waa mid kamid ah waxyaabaha ugu khatarta badan ee aad waligaa samayso. Aad ayay muhiim kuugu tahay inaad caafimaad qabto aadna samayso dookhyo wanaagsan marka aad gaari wadayso. Halkaan ayaad ka helaysaa qaar kamid ah qaababka aad ku noqonaysa darawal amaan ah:

## Aragga iyo Maqalka

Waa inaad awoodaa inaad si faseex ah wax u aragto marka aad gaari wado. Aad ayay muhiim u tahay inaad akhrin karto calaamadaha wadooyinka ayagoo kaa fog. Waa inaad si faseex ah ugu jeedaa si aad qaab degdeg ah uga falceliso khataraha. Haddii aadan si faseex ah wax ugu jeedin ma noqon kartid darawal amaan ah.

Waa inuu si joogto ah u baaraa indhahaga dhakhtarka indhaha aadna markasta raacdaa talooyinkiisa. Ha xiran ookiyaale ama muraayado daahan habaynkii maadaama ay yareynayaan aragaaga muhiimka ah, ee habaynkii.

Inta badan waxa aad ku samayso gaariga ayaa ku xiran waxa aad u jeedo. Arag wanaagsan waxaa laga wadaa:

- Aragga faseexa ah: Haddii aadan u arki karin si faseex ah waxaad dhib ku qabi kartaa xukumida badka iyo arkida khatarta soo socota. Hadday sidaas tahay, ma awoodi doontid inaad ka falceliso sidii degdega ahayd ee la rabay.
- Aragga wanaagsan ee geeska: Waa inaad wax uga jeedaa geeska ishaada. Tan ayaa kuu sahlaysa inaad aragto gaariyaasha ka imaanaaya midkood labada gees adoo ishaada ku haya wadada kaa horaysa.
- Badka go'aan gaarista: Si faseex ah ayaad wax u arki kartaa laakiin wali ma awoodi kartid inaad go'aan ka gaarto badka. Go'aanka badka oo sax ah ayaa muhiim u ah go'aaminta badka aad u jirto gaariyaasha kale.
- Araga wanaagsan ee habaynkii: Dad badan oo si faseex ah wax u arki kara maalintii ayaa dhibaato ku qaba inay wax arkaan habaynkii. Qaarkood ayaan arki karin waxyaabaha nalka hoosk leh. Qaar kale ayaa dhibaato ku qabi kara caadka nalalka hore. Caqabadahaan ayaa darawalka gelin kara khatar.

Hubi in indhahaaga la baaro sanad kasta ama labadii sano kasta uuna baaro xirfadle tababaran. Waxaa laga yaabaa inaadan marna ogaan aragga geeska ee liita ama go'aanka badka ee xun ilaa in indhahaaga la baaro maahee si joogto ah.

Maqaku wuu uga muhiimsan yahay darawalnimada in ka badan inta dad badan xaqiiqsan yihiin. Maqalkaaga ayaa kaaga digi kara khatar - codka hoonka, seeriga, bariiqashada taayirada. Mararka qaar waxaad maqli kartaa gaari ku jira aaga aadan u jeedin kaasoo aadan arkayn. Dhibaatooyinka maqalka, si lamid ah aragga liita, ayaa ku imaan kara si gaabis ah ilaa aadan ogaan ba. Darawallada og inay qabaan dhibaato maqaka ah ayaa baran kara la qabsigooda. Waxay aad ugu tiirsan yihiin aragooda. Xataa dadka maqalkoodu caafimaad qabo ayaan si fiican wax u maqli karin haddii raadiyaha shoocaac ku furan yahay. Ha kuu shidnaado raadiyuhu hana xiran sameecadaha dhagaha ama aaladaha wax lagu dhagaysto inta aad gaariga wado.

## Daalka

Waad daalan tahay marka aad jir ahaan ama maskax ahaan u daasho. Waxaa sababi kara dhibaatooyinka jirka ama dhimirka, xanuunka, ama hurdo la'aanta. Xasuusnoow, marka aad daalan tahay, uma wadi kartid gaariga isla sida marka aad nasiinada heshay. Daalka ayaa saamayn kara diiradaada. Daalka ayaa sidoo kale daciifin kara maskaxdaada iyo jirkaaga marka go'aannada aad qaadato waa kuwo gaabis ah oo ay adag tahay inaad gaarto waxaadna noqonaysaa qof xanaaqu qarka ka saaran yahay. Waxaa laga yaabaa inaadan falcelin u samayn sidii dhakhsaha lahayd ee aad u baahnayd haddii gaari uu si lama filaan ah hortaada u istaago. Ha wadin gaari haddii aad si xad dhaaf ah u daashay waayo ma dooneysid inaad seexato adoo gaariga wada.

**Ku Baraarug Xaqiiqada**

Maamulka Badqabka Wadooyinka Waawayn ee Qaranka ee Mareykanka ayaa ku qiyaasay in sanad kasta tiro badan oo dhan 240,000 oo shil oo la xiriira seexashada ayadoo gaari la wado ay dhacaan. Xog uruurin dhawaan soo baxdayna, 25% darawallada xog uruurinta ka qaybgalay ayaa sheegay inay seexdeen ayagoo gaari wada, halka hal kamid ah labaatankii qofba uu sheegay inuu shil ku galay seexashada asagoo gaari wada ama inuu lunmoonaayay asagoo gaariga wada. Waxaa intaas dheer, isku dhacyadaan ayaa noqon kara kuw aad u daran. Halkaan ayaadna ka helaysaa arin kale oo dareen qariban abuuraysa; si lamid ah marka aad gaari wado adoo cabsan khamri, lulmada ayaa si xun oo naafaysa awoodaada gaari wadista.

**Lama Dagaali Kartid Hurdada**

Intee badan ayaa aaminsan inaan maamulno marka aan seexanayno. Laakiin xaqiiqada ayaa ah in hurdada **aan** la xakamayn karin. Kagama hortagi kartid kafee. Kuma soo jeedin kartid muusig cod dheer. Mana hor istaagi karitd keliya inaad daaqad jebiso si aad u hesho hawo cusub. Xaqiiqada ayaa ah haddii aad hurdaysan tahay marka aad gaari wado inay suuragal tahay inaad seexato muddo kooban aadana kaba warqabin; "hurdooyinkaan yaryar" ama hurdada gaaban ayaa socd keliya afar ilaa shan sikin laakiin marka aad ku socoto xawaare dhan 55 mayl saacadii, hurdada ugu yar ayaa abuuri karta geeri.

**Seexo Kahor inta aan Hurdadu Ku Qasbin.**

Haddii aad dareemayso inaadan helin hurdo kugu filan, keligaa ma tihid. Waxaa la qiyaasay in 30% ilaa 50% naga mid ah aysan helin hurdo ku filan oo jirkeenu u baahan yahay. Natiijada ayaa ah "daynta hurdada" ee jirkeenu nagu leeyahay. Qaabka keliya ee aan dayntaan u bixin karnana waa inaan hurdo dheeri ah seexano. Haku kadsoomin inaad dareemayso soo jeedis buuxda kahor marka aad qorsheynayso inaad gaari wado, waayo isla marka aad gaariga wado oo aad jirka nasiso, hurdadii bargo'a ahayd ayaa ku qabsan karta kadibna ku gelin karta khatar wayn oo ah inaad gama;'do.

**Hurdo Intee dhan Ayuu Jirkaagu u Baahan yahay Dhab ahaantii?**

Qofkasta wuxuu leeyahay baahi uu ku dhashay oo la xiriirta cadadka hurdada. Waa suuragal inaad awoodo inaad toosto kadib marka aad huruday muddo yar oo dhan 6 saacadood. Laakiin waxaad noqon kartaa qof u baahan 10 saacadood inuu hurdo. Sidee ayaad ku ogaanaysaa? Dadka cusub, maha inaad isku halayso saacada galbaleelka si aad u kacdo subax kasta; haddii aad hesho hurdo kugu filan, maskaxdaada ayaa si iskeed ah u kacaysa. Halkaan ayaad ka helaysaa qaab kale oo aad ku ogaato: xili danbe miyaad seexata inta lagu jiro maalmaha fasaxa asbuuca ama gama'daa adoo fadhiya? Haddii aad sidaas samayso, jirka ayaa wax kuu sheegaaya. Waxaana xaq kuugu leh caafimaadkaaga iyo badqabkaaga inaad dhagaysato jirka adoo seexanaaya saacado dheeri ah.

**Naso si aad U Badbaado**

Halkaan ayaad ka helaysaa tilmaamo kaa caawinaaya xaqiijinta inaad ku timaado si amaan ah.

- Xaqiiji inaad hurdo badan seexato habaynka ka horeeya kahor inta aadan safar u bixin. Qorshee inaad gaari wado keliya inta lagu jiro wakhtiga aad caadiyan soo jeedo. Marna ha iskudayin inaad isku qasabto gaarista meeshii aad u socotay taas badelkeedna ka leexo wadada oo raadso meel amaan ah oo aad ku nasato.
- Iska ilaali inaad gaari wado inta lagu jiro xiliga jirkaagu "daciifka yahay." Qaado nasiinada aad u baahan tahay oo raadso meel amaan ah oo aad seexato inta u dhexaysa saqda dhexe iyo 6 a.m.

- La hadal rakaabka haddii uu jiro qof kula safraaya si aad u soo jeediso maskaxdaada. Isku badela gaari wadista si midkiinba mar u nasto.
- Xaqiiji in labadaba dadka fadhiya kursiga hore ay soo jeedaan. Darawal u baahan inuu nasto waa inuu tagaa kursiga danbe, iskala baxshaa uuna seexdaa. Sabab? Marka yoolku yahay markasta inaad soo jeedo, ma fiicna in qofka kugu xiga uu seexdo.
- Mudeyso nasiino labadii saacba mar ama 100 mayl kasta lakiin xili hore joogso haddii aad waajahayso wax kamid ah digniinaha khatarta ee daalka oo qaado jiif yar oo nasiino ah oo dhan 15 ilaa 20 daqiiqo.
- Eeg tilmaamaha ku qoran daawadaada. Daawada qaar ayaa sababaysa hurdo.
- Ha cabin khamri kadibna wadin gaari.
- Ha cunin daawooyin kale marka aad gaariga wado.

**Tilmaamaha Khatarta Hurdada**

- Waa inaad samayso dedaal miyir qaba si aad u kala furto indhahaaga.
- Kor u qaadayso madaxaaga.
- Aadan joojin karin halaaqada.
- Aadan xasuusan gaari wadistaadii dhawrkii mayl ee ugu danbeeyay.
- Aad markasta ka baxayso laynkaaga.
- Aad dareemayso wajaho wareer, iyo kala daadsanaan.

Haddii aad qabto xataa hal kamid ah astaamahaan, waxaad ku socotaa khatar marka ka leexo wadada oo raadso meel badqab leh si aad u seexato.

**Sida ugu haboon ee aad daalka uga hortagi karto waa inaad nasiino badan qaadato.**

## Waxyaabaha Mashquuliya Darawalka

Mashquulku waa wax kasta oo maskaxdaada ama jirkaaga ka mashquuliya gaariga aad wado. Mashquulka ayaa sababi kara burbur, dhaawacyo, iyo geeri. Inaadan eegin wadada ama aad gacmaha ka qaado isteerinka ayaa khatar ah. Wax kasta oo maskaxdaada la leexinaaya gaari wadista waa khatar.



Iskuday inaad iska ilaaliso mashquulka kahor inta aadan gaariga wadin adoo daminaaya taleefannada gacanta, degsanaaya nidaamka isku socodka, cunto cunaaya, isna diyaarinaaya kahor inta aadan bixin, oo xiraaya dhammaan meelaha dabca.

Marka aad gaari wadayso:

- Haku hadlin taleefanka oo ha qorin fariin qoraal.
- Hla murmin dadka rakaabka ah.
- Ha cunin cunto adoo gaari wada.
- Xaqiiji in carruurta suumanka si fiican loogu xiro.
- Ku hay xayawaanka rabaayada ah sallada xayawaanka lagu qaado ee gaariga.
- Meesha ka saar waxyaabaha kaa mashquulinaaya gaari wadista. Waa masuuliyad ku saaran inaad gaarigaaga si amaan ah u wado.

Waxaan ku nool nahay bulsho 24 saac maalintii, ay xogtu hagto taasoo xiriirada degdega ah ay qayb ka yihiin nolol maalmeedka. Xogta ayaa muujinaysa in 91% dadka Ameerikaanka ah ay haystaan taleefanka gacanta, fariin qoraaluna kordhay in ka badan 2,200% shantii sano ee lasoo dhaafay!

Xiriirada degdega ah ayaa ka dhigi kara ganacsiyada kuwo hufan, kordhinaaya wax soo saarka oo siinaaya faa'iidooyin kale bulshada, ayna ku jiraan gurmadka xaaladaha degdega ah. Hase yeeshee, adeegsiga aaladaha isgaarsiinta ee gaariyaasha socda ayaa mashquulin kara dareenka darawalka oo ka leexinaaya shaqada gaari wadista una keenaaya shilalka daran oo waxyeellada dhaliya sida kuwa ka dhasha gaari wadista adoo cabsan ama habdhaqanka kale ee gaari wadista ee khatarta ah.

Gaari wadista mashquulka ah ayaa hadda noqon krta sababta ugu wayn ee shilalka gaariyaasha.

Daraasad lagu sameeyay wadista gaariyaasha ee darawallada taraagyada uuna sameeyay Machadka Gaadiidka ee Virginia Tech ayaa muujisay in mashquulka ugu khatarta badan ee l ogaaday uu ahaa fariin qorista. Daraasada ayaa sheegaysa in darawallada taraagyada ee gaariga ee fariin qoraalka diraaya ayagoo gaariga wada ay 23 jeer ugu badan yihiin khatarta shilka ama ku sigashada shil.

Sharciyada mamnuucaaya adeegsiga taleefanka gacanta iyo fariin qorista ayaa saamayn ku leh badqabka, laakiin joojinta shilalka bilaa macnaha iyo geerida ee mashquulladu sababi karaan ayaa lagu fuliyaa sida ugu fiican ayadoo la badelaayo habdhaqanka darawalka.

Si loo baabi'iyo ama loo maareeyo mashquulada, waa muhiim inaad fahanto sadex qaybood oo kaladuwan:

**Mashquulka aragga** kaasoo ku keenaaya darawalka inuu ka jeesto wadada uuna eego wax aan qusayn gaariga uu wado, sida boorarka wadada, dhacdooyinka shilka, samafaleyaasha wadada iyo dareennada kale ee banaanka.

**Mashquulka jireed** kaasoo dhaca marka darawalku midkood ama labadaba gacmoodba ka qaado isteerinka ama maamuleyaasha kale ee gaari wadista si uu u sameeyo shaqo ka baxsan gaari wadista, sida cunto cunista, wax cabista, toosinta muraayadaha, shidista raadiyaha, ama nidaaminta GPS.

**Mashquullada dhanka maskaxda** waa waa fikradaha iyo dareennada maskaxda ku soo dhaca (xanaaqa, walwalka, cabsida, iwm.) kuwaasoo mashquuliya darawalka dareenkiisana ka leexiya wadada.

Inkastoo warbaahinta iyo sharci dejiyaashu inta badan diirada saaraan khataraha fariin qoraalka iyo taleefanka gacanta lagu qabsado marka uu gaarigu socdo, noocyada kale ee mashquuliyaasha ayaa leh khatar kuwaas u dhiganta. *Ku dhawaad dhammaan shilalka ayaa quseeya iskudarka labo ama dhammaan sadexda nooc ee mashquuliyaasha!*

Eegista kooban ee qaybaha gaariga, muraayadaha, aaladaha isgaarsiinta ee ku rakiban, ama tignooloojiyada kale ayaa si amaan ah loo samayn karaa haddii iskaanadaan lagu soo koobo wax kayar hal sikin ayna quseeyaan keliya shaqada gaari wadista. Marka aad degdegayso si aad u gaarto wakhtiga qaadista ama wakhtiga loo cayimay gaynta alaabta ama aad ka hormarto jaamka wadooyinka waxaana mararka qaar samayn karnaa khatar loo dhiman karo anagoo iskudayayna inaan shaqooyin badan qabano anagoo gaari wadna.

**Ku Adeegsiga Taleefanka Gacanta Gaarigaaga**

Marka si sax ah oo adeegsado taleefannada gacanta waxay kor u qaadaan badqabka darawalka waxayna siisaa digniinta moobilka bulshada. Si ay nooga caawiso xaqiijinta in isticmaaleyaasha taleefanka ay si amaan ah gaariga u wadaan fadlan raac talada guud ee hoos ku qoran.

- Aqoonso in gaari wadistu u baahan tahay dareenkaaga buuxa.
- Ka bax wadada kahor inta aadan qofka wicin.
- Ku xiro gaarigaaga taleefan aan u baahnayn inaad gacanta ku qabato ama sameecada u furo.
- Waydii rakaabka gaariga ku jira inay kuu wacaan taleefanka.
- Xaaladaha degdega ah, u sheeg qabtaha taleefanka inaad soo sheegayso xaalad caafimaad ama booliis oo degdeg ah, meesha aad joogto, iyo in ay jirana dhaawacyo iyo inkale.
- Saar taleefannada gacanta rakadooda si aysan u noqon sababta shilka.

Qof aan gaarin da'da 18 sano ayaa si gaar ah looga mamnuucay inuu wado gaari matoor ku shaqeeya asagoo isticmaalaaya taleefanka gacanta ama aalad elektaroonigga ah oo gacanta lagu qaato. Jebinta xeerka waxaa loo arkaa danbi ka dhanka sharciga wadooyinka.

## Gaari u Wadidida Si Gardarro Leh

Gaari u wadidida si xawaafnimo ah waa khatar.  Gaari u wadidida si Xawaafnimo ah waxaa kamid ah xawaaraynta, ku daba qabashada gaari kale, layn badelida khatarta ah, inaadan fareejo bixin marka aad leexanayso, iyo in aadan raacin tilmaamaha wadada (tilmaamaha joogsiga, tilmaamaha boos siinta, digniinaha wadada, tilmaamaha isgoyska tareenka, iwm.)

Gaari u wadidida si Xawaafnimo ah ayaa waxyeelo u gaysan karta adiga iyo dadka kale.

Ha xanaaqin marka darawallada kale galaan khaladaad ama kuula dhaqmaan si qalafsan. U yeelo dulqaad oo qadari dadka kale.

## U diyaarsanaanta Gaari Wadista

Gaari wadistu waa mid kamid ah waxyaabaha ugu culus ee dadku sameeyaan. Inaad si sax ah u samayso ayaa u baahan xirfad iyo garasho badan. Marka aad tahay darawal cusub waxay u baahan tahay dhammaan inta aad awoodo si aad gaariga ugu wado si amaan ah. Haddii wax yareeya awoodaas kugu dhacaan uma wadi kartid gaariga sidii caadiga ahayd. Awoodaada gaari wadista waxaa saamayn ku leh:

**Khamrada iyo Daroogada kale**

Khamriga iyo daroogada kale ayaa 40% ka ah dhammaan shilalka loo dhinto. Suuragalnimada ah inaad shil gasho ayaa sida caadiga ah ka wayn haddii aad cabto khamri ama daroogo isticmaasho adoo gaari wada. Marka aad baranayso darawalnimada gudaha Maine, mid kamid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad xasuusnaanayso waa kan: GAARI KU WADISTA GUDAHA MAINE WAA SAD DHEERI AH, MAAHA XUQUUQ - dadka ku fashilma inay gaariga u wadaan si badqab leh oo qadarin leh waa loo diidi doonaa sadkaas. Si kale haddaan u dhaho - haddii aad si khaldan u maamusho gaariga, ***GANAAX XUN AYAA LAGUGU SOO ROGI DOONAA.***

**MID KAMID AH WAXYAABAHA LA HUBO INAAD KU LUMINAYSO SHATIGAAGA WAA INAAD KHAMRI CABTO KADIBNA GAARI WADO.**

Khamriga waa daroogo. Waa daroogada loogu isticmaalka iyo iska badin badan yahay gudaha Mareykanka maanta; khamriga ayaa dumin kara horay u baabi'iyay nolosha malaayiin dad ah. Haddii aad khamro cabtay, HA WADIN GAARI. Haddii aad gaari wadayso, HA CABIN KHAMRI.

Si loo joojiyo wadista gaari asagoo qofku cabsan yahay, Maine ayaa dhaqan geliyay mid kamid ah sharciyada ugu adag wadanka oo dhan ee la xiriira gaari wadista adoo cabsan (OUI). Xaqiiqdii, suuragalnimada ah in lagu xiro oo lagu ciqaabo ayaa aad ugu badan Maine marka loo eego inta badan goballada kale!

XASUUSNOOW: Haddii aad qiimeynayso naftaada iyo nolosha dadka kale, aadana dooneyn diiwaanka danbiyada ama inaad muddo xabsi gasho - *HA WADIN GAARI ADOO CABSAN!*

**Haddii aad ka yar tahay 21 sano**

Waa mamnuuc in dadka aan gaarin 21 ssano ay cabaan, iibsadaan ama qaadaan cabitaanka khamriga. Sidaas awgeed, waa inaadan gaari wadin kadib marka aad cabto wax uun khamri ah. Khamriga iyo daroogooyinka kale ayaa saamaynaaya awoodaada aragga waxa aagaaga ka socda. Waxay gaabis ka dhigaan ka falcelintaada khataraha waxayna dib u dhigaan feejignaantaada.
Haddii lagugu xukumo inaad gaari waday adoo cabsan, waxaad:

- lumin doontaa shatigaaga darawalka ugu yaraan hal sano
- waxaa lagugu xukumayaa ganaax kulul
- waxaa laga yaabaa inaad xabsi gasho
- waxaa lagaa dooni doonaa inaad bixiso qarashka dib u soo celinta shatiga
- waxaa lagugu qasbi doonaa inaad marto waxbarashada khamriga iyo daroogada kale, baaritaan iyo barnaamijka dhaqan gelinta
- haddii ay kula socdaan rakaab kayar 21 sano jir, shatigaaga ayaa la laali doonaa 180 maalmood oo dheeraad ah

**Saamaynta Khariga iyo Maandooriyaasha Kale**

Khamriga iyo daroogooyinka kale ayaa saamayn doona:

- *Garashadaada* – Awoodaada xalinta dhibaatooyinka.
- *Aragaaga* – Dareenkaaga ugu muhiimsan ee gaari wadista waa aragaaga. Khamriga iyo daroogadu waxay caad saaraan aragaaga waxayna yareeyaan awoodaada diirada. Waxay sababaan humaagta aragga. Waxay yareeyaan awoodaada xukumida badka, xawaaraha, iyo dhaqdhaqaaqa. Waxyeelada aragga ayaa dhan .02 BAC dhammaan darawallada.
- *Kala garashada Midabka* – Waxay yareysaa awoodaada arkida midabyada kaladuwan.
- *Wakhtigaaga falcelinta* – Khamriga iyo daroogada ayaa yareeya awoodaada ka falcelinta khatarta.

Ha wadin gaari adoo cabay khamri ama daroogooyin kale. Waxaad luminaysaa xirfadahaaga gaari wadista marka koobaad ee khamri cabto. Marka aad cabto hal khamri ama ka badan waxaa laguu xiri karaa gaari wadis adoo cabsan khamri ama isticmaalay maandooriye kale. Marna ha u ogolaan qof kale inuu gaari wado haddii uu cabsan yahay.

**Sida Khamrigu U Naafeeyo Darawalnimada**

Wadista gaari maaha shaqo fudud, oo ciyaar-ciyaar ah sida dad badan oo idin kamid ah aaminsan yihiin. Gaari wadistu waxay u baahan tahay go'aan joogto ah waana, sida caadada u ahba, mid adag oo khatar badan. Darawalnimada wanaagsan waxay u Baahan tahay:

- **Garasho Wanaagsan** - Garasho wanaagsan waa awooda u fakarida si faseex ah iyo gaarista go'aanno degdeg ah, ayna ku jiraan qiimeynada saxda ah ee wakhtiga, badka, iyo booska. Khamrigu wuxuu naafeeyaa garashada wanaagsan. Hadba inta uu darawalku badsado khamrada, ayay sii yaraataa garashadadiisa ilaa ay ka sababto geeri.
- **Aragga Wanaagsan** - Aragga wanaagsan waa awooda wax u arkida si faseex ah iyo inaad aragti ahaan ka warqabto waxa ka socda aagaaga inta aad gaariga wado. Awooda aragtida faseexa ah ayaa muhiimad dheeri ah sii leh habaynkii maadaama aragga caadiga ah hoos u dhaco 50% sabab la xiriirta mugsiga indhahaaga oo yaraynaaya shaqadooda. Khamrigu wuxuu si xun u naafeeyaa aragga wanaagsan. Tusaale:
    - Khamriga ayaa nasiya murqaha indhaha taasoo yareynaysa awoodaada aragga marka ay uu si degdeg ah u kordho nalku, sida marka nalalka hore ee gaari soo socda ay qabtaan indhahaaga. Waxay caadiyan qaadataa ku dhawaad todobo sikin in indhahaagu kasoo kabtaan shoocaaca nalka hore marka haddii aad ku socoto 55 mayl saacadii taasii waa badka ku dhawaad labo garoon oo ciyaareed! Indhaha darawallada cabsan ayaa qaata muddo aad uga dheer taas si ay uga soo kabtaan caadka noocaas ah.
    - Khamriga ayaa sidoo kale diirada saara awoodaada aqoonsiga waxyaabaha geeska kaa xiga marka aad horey eegayso. Kadib marka aad khamro cabto, waxaa yar awoowaada arkida gaariyaasha soo socda, ku baasaaya ama baakinka ku jira, iyo/ama dadka lugaynaaya ama baaskiileyda maraysa geeska wadada.
    - Waxaa intaas dheeri, khamriga ayaa yareeya awoodaada xukumida dhawaanta ama fogaanta uu gaari kale ama sheey kuu jira.
- **Xakamaynta Shucuurta** - Xakamaynta shucuurta qofka ayaa u sahlaysa darawalka maskaxda fiyoow leh inuu adeegsado garasho wanaagsan marka uu gaari wado. Maadama ay tahay maskax dajis, khamriga ayaa si tartiib ah u damiya qaybo badan oo maskaxda ah. Marka wakhti laga joogo, dadka khamriga caba ayaa noqda kuwo aan maskax fayoobayn, si fudud u murugooda, u niyad jaba ama u xanaaqa sidaas awgeedna ay u badan tahay inay khataro galaan marka ay gaari wadaan.
- **Feejignaanta, Diirada, Diyaarsanaanta iyo Wakhtiga Falcelinta** - Khamriga ayaa sidoo kale caqabad ku ah awooda maskaxda ee falcelinta iyo wax diirad saarida. Darawal khamri cabay ayay u badan tahay inuu seexdo asagoo gaariga wada ama uu gaariga kala baxo wadada. Waxaa intaas dheer, hadba inta uu qofku badsado khamriga, ayay yaraanaysaa maamulkiisa isku xirka shaqada jirka iyo dhaqdhaqaaqa.

**Si fudud hadaan u dhigo, qof khamri cabay waxay u badan tahay inuu:**

- Gaariga ku wado xawaare dheereeya ama aad u gaabis ah marka loo eego marxalada uu ku jiro;
- Inuu ku fashilmo akhtiina nalalka hore marka a gaariyaal kale soo socdaan;
- Inuu si aan qumanayn u baas gareeyo - inuu khatar geliyo gaariga kale, inuu muddo dheer qaato, ama sheelaraynta si xad dhaaf ah;
- Inuu si joogto ah u badelo laynka;
- Inuu ku fashilmo ku sugnaanta dhexda laynka;
- Inuu jebiyo iyo/ama ixtiraami waayo tilmaamaha wadada;
- Luminta feejignaanta iyo la qabsiga xaaladaha degdega ah; iyo
- Inuu qaato muddo dheer inuu bareegga qabto.

**DIGNIIN:** Waxaa ugu sii daran, xili aragaaga, falcelintaada, isku xirkaaga, iyo garashadaadu sii baaba'ayaan markasta oo aad khamriga ka kabato, waxaad noqonaysaa qof sarqaankiisu sii bato. Waxaad xataa yeelanaysaa dareen been ah oo faya qab iyo kalsooni leh. Si kooban marka loo dhaho, waxaad khatar ku noqonaysaa naftaada iyo qof kasta oo maraaya ama u dhow wadada kamana warqabtid!!

**DARAWALLADA WANAAGSAN KHAMRI MA CABAAN!**

Suuragalnimadaada shilka gaariga ayaa kordhaysa mar kasta oo aad khamri cabto! Suuragalnimada ah inaad shil gasho ayaa kordhaysa marka BrAC gaagu kordho:
Heerka Khamriga (Eeg Bogaga 3-9 iyo 3-10)
0.05 garaam ............... 1 wakhti
0.10 garaam ............... 6 wakhti
0.15 garaam ............... 25 jeer

In ka badan 50% darawallada sida khatarta ah u dhaawacma ayaa cabsanaa khamri gaaraysa .06 garaam 100 mililiter oo dhiig ahba ama 210 liitar oo neefta ah.

**Quraafaadka la Xiriira Khamriga.**

***Khamriga iyo Xashiiska.*** Dadka qaar ayaa aaminsan in haddii ay cabaan khamri, inay isticmaalayaan aalkolo kayar tan ay cabayaan dadka caba cabitaannada isku dhafan. Waa khaldan yihiin! Waxaa jira qiyaastii cadad isle'eg oo aalkolo ah oo ku jirta qasaca 12 ox ah ee khamriga ah oo ku jita inta ku jirta cantuugada 1 oz ah calaqa adag ee 100 cantuugo ah ama galaaska 4 oz ah ee khamrada (ama 10 oz oo khamrada qaboow ah).

***"Dadka ayaa sarqaama marka ay kala badelaan cabitaanka."*** WAA KHALAD! Badelidu caadiyan wax farqi wayn ah ma samayso. Dadku waxay ku sarqaamaan cabista khamri badan. Waa intaas!

***"Dadka ayaa noqda farxaan marka ay khamri cabaan."*** WAA KHALAD! Tirakoobyadu waxay muujinaysaa in ku dhawaad hal meelood nuska dilalku ay la xiriiraan khamriga, halka ay yihiin sadex meelood labo meel dhammaan isdilka.

***"Dumar yar ayaa khamriga caba"*** WAA KHALAD! Iska badinta khamrigu jinsi gaar ah malahan. Haweenka ayaa khamrada iskaga badin kara sida ragga.

***Toosinta miyirkaaga.*** Sabab la xiriirta in beerka qof kasta uu u shiido khamriga heer iskumid ah, ma jiro wax sarqaanka kaa bixin kara. Cabista kafee madoow, ku qubaysiga biyo qaboow, ama jimicsiga ayaa keliya keenaaya qof cabsan oo aan seexanayn, qoyan, ama dhididaaya!



**Khamriga iyo Sharciga**

**BARO SHARCIGA: XOGTA SOO SOCOTA WAA KHULAASADA SHARCIGA MAINE EE GAARI WADISTA ADOO CABSAN (OUI)**

**Laalista Degdega ah ee uu sameeyo Xoghayaha Gobalka**

Haddii aad tahay darawalka gaari aadna wado adoo cabsan khamri heerkeedu gaaraayo 0.08 haraam calaa 100 mililiter oo dhiig am ama 210 liitar oo neef ah, waxaad gashay danbiga wadista gaari adoo cabsan (eeg qeexitaanka hoose). Inta badan, si degdeg ah ayaa laguu xiri doontaa waxaana lagu gelin doonaa xabsi. kadib xiristaada iyo ayadoo lagu saleynaayo warbixinta booliiska iyo natiijada baarista heerka khamriga, Xoghayaha Gobalka ayaa isla markaba laalaaya shatigaaga. Laalistaan ayaa dhacaysa kahor inta aadan tagin maxkamad, sidaas awgeed inta aad sugayso inaad garsoore hortagto, ma wadi doontid gaari!

**Heerka Khamriga ku Jirta Neefta**

Khamriga Neefta (BrAC) waa keliya qaab gaar ah oo lagu cabiro boqolkiiba garaamyada khamriga ee 210 liitar kasta oo neefsi ah. Waxaa lagu cabiraa garaamyo waxaana lagu cabiraa qiimaynta kiimikada. BrAC ga waxaa lagu go'aanshaa heerka khamriga la cabay, wakhtiga jirku u baahan yahay inuu khamriga iska saaro, iyo miisaanka qofka. Jirka ayaa khamriga iskaga saaraaya heer joogto ah oo aan la badeli karin. **Fiiro gaar ah: Cadad *kasta* oo khamri ah ayay u badan inuu naafeeyo awoodaada gaari wadista.**

**Baaritaanka Heerka Khamriga**

Waxaa jira labo nooc oo baaritaan ah kuwaasoo loo adeegsan karo cabirka heerka khamriga: Baaritaanka **Neefta ama Dhiiga**. Baaritaanadaan ayaa loogu talo galay inay cabiraan cadadka khamriga ku jira sambalka dhiiga. Natiijooyinka baaritaanka noocaas ah ayaa loo adeegsan karaa cadeyn a horgeeyo maxkamada waxaana si buuxda looga aqbalayaa dhammaan maxkamadaha inay tahay mid sax ah. Sida ku cad sharciga hadda ee maine, sarkaalka booliiska ayaa samaynaaya baaritaanka neefta (asagoo adeegsanaaya midkood Sobermeter ama Intoxilizer) ilaa in sarkaalku go'aansho maahee inaysan macquul ahayn in baaritaanka la sameeyo. Haddii baaritaanka neefta la sameeyo, darawalka ayaa laga doonayaa inuu keeno baaritaanka dhiiga kaasoo uu bixin karo dhakhtarka uu doorto darawalku haddii dhakhtarka la heli karo.

**"Ogolaasho Maldahan" Xogteeda Buuxda?**

Waa muhiim in darawallada Maine ay xasuusnaadaan in shatiga darawalnimadu uusan ahayn "xuquuq" aasaasi ah oo uu bixinaayo Datuurkeenu. Waa dangaar ah oo qofka la siiyay lagalana noqon karo marka uu Gobalku go'aansado.

Si kooban haddaan u dhaho, marka aad wado gaari gudaha Maine waxaad si otomaatig ah u ogolaanaysaa baaritaanka markasta oo maamulku doonaayo inuu kugu sameeyo. Laguguma qasbi doono baaritaanka noocaas ah, laakiin shatigaaga darawalnimada ayaa isla markaba la laali doonaa haddii aad diido. Laalistaan ayaa soconaysa muddo dhan ilaa lix sano uuna samaynaayo Xoghayaha Gobalka. Waa laalis maamulku sameeyo - taasoo a dhigan in aan loo baahnayn dacwad maxkamadeed. **Waxaa intaas dheer, marqaati kaca booliiska qofka soo xiraaya ee quseeya habdhaqankaaga gaari wadista ayaa keeni kara in lagugu xukumo OUI xataa ayadoo aan lahayn natiijada baaritaanka khamriga oo taageeraysa!**

Sharciga ayaa sidoo kale ka doonaaya darawal kasta gaari inuu aqbalo baaritaanka kiimikada si loo go'aansho heerka daroogada haddii ay jirto sabab macquul ah oo lagu aamini karo inuu gaariga waday asagoo daroogo cunay badelka khamrada.

Laalista maamulka ee uu sameeyo Xoghayaha Gobalka ayaa sii shaqeynaysay xataa haddii hadhoow la ogaado inuusan qofku gelin OUI. Sidoo kale, haddii lagugu helo danbiga ayadoo la cuskanaayo marqaati kaca booliiska, diidistaada gelista baaritaanka ayuu u arkayaa cadeyn garsooruhu laalis labaad oo OUI ah ayaana lagu saari doonaa, marka waxaa lagu saarayaa ganaax aad uga dheer kii aad geli lahayd haddii aad baarista ogolaan lahayd.

Xasuusnoow, imtaxaan ayaa sidoo kale ku difaaci kara. Haddii aadan sharciyan khamri cabin, baaritaanka ayaa muujinaaya.

**Haddii lagugu xukumo inaad gaari waday adoo Cabsan Heerka Badan ee Khamriga**

***Xukunka Koobaad ee Maxkamada*** Haddii lagugu xukumo OUI heerkaaga khamriguna gaaraayo 0.08 ilaa 0.14 garaam calaa 100 mililitar oo dhiig ah ama 210 liitar oo neef ah:

- waxaad heli doontaa ganaaxa qasabka ah oo dhan ugu yaraan $500.00, $600.00 marka aad diido
- waxaad luminaysaa shatigaaga ugu yaraan 150 maalmood
- waa inaad dhiibtaa qarashka soo celinta shatiga
- waxaa lagugu qasbi doonaa inaad marto waxbarashada khamriga iyo daroogada kale iyo barnaamijka dhaqan gelinta

Ama

Haddii lagugu xukumo OUI heerkaaga khamriguna gaaraasyo 0.15 garaam calaa 100 mililiitar oo dhiig ah ama 210 liitar oo neefsi ah ama ka badan; ama aad safrayso 30 mph ama ka badan heer ka sareeya xadiga xawaaraha; ama aad iskudaydo inaad ka cararto sarkaalka booliiska; ama aad diido inaad marto baaritaanka heerka khamriga; ama aad sido rakaab kayar 21 sano oo gaariga saaran:

- waxaad xirnaan doontaa 48 saacadood (96 saacadood haddii aad diido baaritaanka)
- waxaad luminaysaa shatigaaga ugu yaraan 150 maalmood
- waxaad bixinaysaa qarashka celinta shatiga
- iyo waxaa lagugu qasbi doonaa inaad marto waxbarashada khamriga iyo daroogada kale iyo barnaamijka dhaqan gelinta

Danbiyada kasta ee dheeriga ah ee OUI ayaa keeni doona ganaaxyo kuwaas ka kulul. Sidoo kale, dhammaan danbiga 2aad iyo danbiyada ka danbeeya ee OUI ayaa u baahan keenista cadeunta caymiska qaanta kahor inta aan la ogolaan in shatiga laguu soo celiyo. Maine wuxuu baxshaa barnaamijka muraaqabada ee dadka gala danbiyada OUI. La xiriir OUI Qaybta (207) 624-9000 raaci 52104 si aad u hesho xog dheeraad ah.

Ma jiraan sharciyo noocaa ah oo quseeya shaqada ama shatiga kooban inta lagu jiro mudaa laalista shatiga ka dhashay xukunka OUI. Danbiileyaasha ayaa gebi ahaanba laga mamnuucayaa inay gaari wadaa mudadaas!

**Shatiga Sharuudu ku Xiran tahay**

Marka qofka lagu xukumay PUI uu codsado soo celinta shatigiisa, waxaa la siinayaa shati uu ku xiran yahay shardiga ah inuusan gaari wadin asagoo ay jirkiisa ku jirto wax uun khamri ah.

**Laalista Dheeriga ah:**

Mudada Laalista oo dhan 275 maalmood waa in lagu daraa laalista OUI ga ama diidista haddii uu gaari waday qof kayar 21 sano jir.




Kadib xukunka koobaad ee OUi, shatiga lasoo celiyay ayaa shardi ku xirnaan doonaa muddo hal sano ah. Kadib xukunka labaad ama ka danbeeya, shardi ayaa soconaaya toban sano.

Shatiga shardigu ku xiran yahay ayaa keenaaya in darawalka shatigiisa la laalo muddo hal sano ah, ayadoo aan dhageysi hore la samayn, haddii uu gaari wado asagoo ay jirkiisa ku jirto wax uun khamri ah.

Shati shardi ku xiran yahay ayaa keenaya in shatiga laga laabo darawalka isla mudada laalista taasoo qabanaysa xukunnada 2aad ama 3aad ee OUI haddii uu ado gaari asagoo ay jirkiisa ku jirto 0.08 garaam ama ka badan oo khamri ah 100 mililitar oo dhiig ahnba ama 210 liitar oo neef ah ama ka badan.

Shati shardi ku xiran yahay ayaa keeni doona in shatiga darawalka la laalo muddo labo sano ah sabab la xiriirta inuu diiday inuu ogolaado baaritaanka khamriga, ganaax lagu dari doono aalis kasta oo horay loogu xukumay OUI.

**Daroogooyinka kale ee Ku Naafaynaaya iyo Gaari Wadista**

Daroogooyin badan marka laga soo tago khamriga ayaa saamaynaaya awoodaada gaari wadista. Daroogooyinkaan ayaa lahaan kara saamaynta ay khamrig u leedahay, ama xataa kasii daran. Arintaan ayaa run u ah daawooyin badan oo dhakhtarku qoro iyo kuwa suuqa laga soo iibsado
Erayga "daawo" ayaa si guud loogu adeegsadaa daawooyinka dhakhtarku qoray, daawooyinka suuqa laga iibsado, iyo sidoo kale maandooriyaasha sharci darada ah. Adeegsiga daawo aad suuqa kasoo iibsatay ama daawo dhakhtarku kuu qoray ayaan difaac kuu noqonayn marka maxkamada lagu saaro. Marka khamriga iyo daawooyinka kale ay iskugu tagaan jirka, khatarta gelista shilka wadada ayaa sii waynaanaysa.

***Daawada Aan Dhakhtarku Qorin***

Daawada uusan dhakhtarku qorin ee madax xanuunka, qaboowga, iyo xasaasiyaadka ama dejinta neerfeyaasha ayaa kugu ridi kara hurdo. Kaniiniyada kahortaga fayraska, "daawada neerfaha"iyo kaniiniyada cuntada ayaa kugu ridaaya cabsi, dawakhsanaan, iyo inaad awoodi waydo inaad wax diirada saarto. Qaar kamid ah daawooyinka xasaasiyada, sharoobooyinka qufaca iyo kaniiniyada qaboowga kuwaasoo aad iibsan karto adiga oo uusan dhakhtar kuu qorin waxaa ku jira codeine, aalkolol, maadooyinka xasaasiyada kahortaga, ama bromides kuwaasoo saamayn kara gaari wadistaada. Sidoo kale waxay saamayn karaan aragaaga. Eeg qoraalka daawada ku qoran kahor inta aadan cunin daawada aan dhakhtarku kuu qorin. Haddii aadan hubin inay amaan tahay, waydii dhakhtarkaaga ama farmashiilaha ciladaha daawada.

***Daawada Dhakhtarku Kuu qoro***

Daawooyinka dhakhtarku kuu qoro qaarkood ayaa kuu saamayn kara isla sida ay kuu saamaynayso khamridu. Eeg qoraalka daawada ku qoran kahor inta aadan cunin daawada. Haddii aadan hubin haddii ay amaan tahay inaad liqdo daawada kadibna gaari wado, waydii dhakhtarkaaga ama farmashiilaha.

1. **Amphetamines.** Amphetamines waxaa o adeegsadaa neerfe dejiyaal ahaan, laakiin waxay yareyn karaan awooda qofka ee diirada waxayna sababi karaa sarqaan. Sidoo kale, marka saamayntu kaa ba'do, qofka ayay u badan tahay inuu aad ku daalo uuna niyad jab dareemo.

2. **Tranquilizers (Dejiyeyaasha).** Daawooyinkaan ayaa sababi kara dawakhaad ama lulmo marka lagu dhafo khamriga. Waxay sababi karaa wadne istaag, hoos u dhaca khatarta ah ee cadaadiska dhiiga, waxayna jari karaan qulqulka ogsijiinta galasa maskaxda.
3. **Barbiturates.** Barbiturates waa daawooyin suuxin oo loo adeegsado inta badan in qofka la seexiyo. Isticmaalka daran ayaa sababi kara dawakhaad, jaho wareer, luminta isku xirnaanta, gariirka, iyo dhibaato dhanka fakarka ah.
4. **Marijuana.** Daraasaadka ayaa muujinaaya in dadka isticmaala marijuana oo xiro jebinta xeerarka wadada in ka badan darawallada kale. Isticmaalka marijuana ayaa sababi karta hurdo iyo awood la'aan ku aadan xkumida wakhtiga iyo badka. Sidoo kale, isticmaaleyaasha qaar ayaa soo sheegay in ay diirada saaraan hal wax markiiba, ayagoo iska indho tiraaya waxyaabaha kale ee ku xeeran.

***Daawada Sharci Darada ah***

**Daroogooyinka Adag.** Daroogooyinka adag sida morfiinka, opium, cocaine ta, heroin ta iyo maandooriyaasha. Daroogooyinkaan ayaa leh awood ay uga dhigaan isticmaaleyaasha kuwa gebi ahaanba aan waxba ka warqabin, ama ka indho saaban, waxyaabaha ku xeeran. Ciladaha kale waxaa ku jira dawakhaad, maahsanaan, lalabo iyo matag. Daroogada sharci darada ah ayaa saamayn kara falcelintaada, xukunkaaga, aragaaga, iyo feejignaantaada si lamid ah khamriga.

***Iskudarka Khamrada iyo Daroogada kale***

**Iskudarka Daroogada-Khamriga.** Marar badan, waxaa ka daran khamrada ama daroogada keligeed la isticmaalo isticmaalka khamriga iyo daroogada oo la isku dhafay. Sarqaanka isku dhafan ee labadaan maado ayaa abuuri kara saamayn khatar ah oo ku dhacda maskaxda iyo jirka, taasoo badanaa keenaysa geeri.

Marna khamri ha cabin marka aad cunayso daawooyin kale. Daawooyinka ayaa kordhin kara saamaynada khamriga. Waxay sidoo kale kordhin karaa waxyeelada si iskood ah. Waa inaadan cabin khamri ama adeegsan daroogooyin marka aad gaari wadi rabto.

Aad ayay khatar u tahay inaad gaari wado adoo isticmaalay daroogo, sharci ama sharci daro midkey rabto ha noqotee. Haddii lagugu xukumo inaad gaari waday adoo daroogaysan waxaa lagu marsiin doonaa isla ciqaabaha dadka wada gaari ayagoo khamro cabay. Waxaa intaas dheer, in lagugu helo adoo haysta daawada sharci darada ah ama qaadista sharci darada ah ee gaadiidka oo uu qaado qof aan qaan gaarin ayaa keeni karta ganaaxxyo aad u xun.

**Qabashada Gaariga**

Qofka lagu helo inuu gaari waday asagoo cabsan ama gaari waday kadib marka la laalay shatigiisa haddii laalista loogu sameeyay OUI hore ama danbiga OUI, ayaa la marsiin doonaa Qabashada Gaariga iyo bixinta lacagt qaadista gaariga iyo qarashka kaydka iyo sidoo kale ganaax lacageed iyo muddo uu xabsiga galaayo. Tan ayaa ka dhigan inaad lumin karto maaha keliya xoriyadaada, laakiin sidoo kale gaariga.

**Darawallada galay Shilalka Geerida Sababay**

- Darawal kasta oo gala shil gaari oo loo dhintay ama shil laga yaabo in dad ku dhinteen waa inay maraan baaritaanka kiimikada. Ku fashilmida arintaas ayaa keenaysa laalista shatiga muddo hal sano ah.
- Haddii Xoghayaha Gobalka uu ku qanco in darawal, asagoo khamri ama daroogay cabay, oo si dayac leh u waday gaari qaab dhaliyay geerida qof, Xoghayaha Gobalka ayaa si degdeg ah u laalaaya shatiga darawalka ugu yaraan 1 sano. Laalistaan ayaa noqon doonta mid ku dabo taxan laalis kasta oo lagu soo rogay diidista gelinta baaritaaka kiimikada.

- Waxaa intaas dheer, xukunka danbi lagu galo gaari oo maxkamada danbiga ay rido maxkamada danbiyada ayaa keenaysa kordhinta mudada xabsiga iyo la noqoshada shatigaaga darawalka ugu yaraan 5 sano. Haddii aad cabsan tahay marka aad danbiga gashay, shatigaaga ayaa si abadiyan ah loola noqon doonaa.

**Sharciga Qasaca Furan**

Darawalka gaariga ku wadaaya wado dadwayne ayaa jebinaaya sharciga haddii darawalka ama rakaabka saaran aaga rakaabka gaariga uu cabo kahmri ama uu haysto qasaca furan ee khamriga.

**Shardi Dhaafyada:**

- Darawal ama rakaab haysta qasaca furan ee cabitaanka khamriga oo saaran gaari aan lahayn buudka danbe hadddii qasaca furan ee khamriga uu yaalo gadaasha kursiga ugu danbeeya ee kor u jeeda ee gaariga ama aaga uusan caadiyan fariisan darawalka ama rakaabku.
- Rakaab lacagta lagu soo qaaday uu cabo ama ku haysto khamri qasaca khamrada oo saaran gaariga loogu talo gaay inuu rakaabka ku qaado lacag oo aan ahayn taksi.
- Rakaab uu haysto qasaca furan ee khamriga, ama rakaabku uu khamri ku cabo aaga fadhiga ee guri gaari ah, tareelar, tareelar yar ama taraaga kaamka.
- Darawalka ama cida uu u shaqeeyo darawalku ay haystaan shatiga saxda ah ee cunto bixinta banaanka loo qaado oo khamriga la gaynaayo ama laga soo qaadaayo munaasabad cunto.

**XASUUSNOOW: Xukun kasta oo OUI ah ayaa Keenaaya Diiwaanka Danbiga!!**

Wadista Gaari adoo Cabsan waa mid Qarash badan kaaga baxaayo, Runtii hal Cabitaan oo ka Badan Xadiga Sharciga ah ayaa Kugu Keeni kara Qarash ka badan $7,000:

| | |
|---|---:|
| Qarashaadka Jiidista Gaariga | $50.00 |
| Damaanada | $40.00 |
| Qareen | $2000.00 |
| Ganaaxa lacageed | $500.00 |
| Koorsada Waxbarashada khamriga | $300.00 |
| Qiimaha Dalacaada ah ee Caymiska 3 Sano ah | $4000.00 |
| Luminta Wakhtiga Shaqada (xabsiga) | $300.00 |
| Qarashka soo Celinta Shatiga | $50.00 |
| Wadarta Guud | $7240.00 |

**Ogeysiiska Gaarka ah ee Dhawr iyo Toban Jirada ah iyo Dhalinta Qaangaarka ah**

Sababta ugu badan ee geerida dhalinta ku dhaqan Mareykanka (da'aha 16 ilaa 24) ayaa ah shilalka la xiriira gaariyaasha. Ku dhawaad 8,500 oo dhalinyaro ah ayaa ku dhinta iyo 40,000 oo dheeri ah ayaa ku naafooba ama ku jajaba sanad kasta sabab la xiriirta khamriga iyo gaari wadista gudaha wadankaan.

Xasuusnoow, in khamrigu yahay daroogo, daroogo waxyeelo u gaysatay oo baabi'isay nolosha tobanaan milyan oo nafood oo dadka khamriga caba ah iyo qoysaskooda. **Khamrigu waa Khatarta Ugu Badan iyo Daroogada ugu Isticmaalka Badan Mareykanka maanta.**

Inkastoo hal ama labo cabitaan ay dadka siin karaan dareen raaxo, khamriga ayaa dadka jiyad jebisa hadba marka aad iska badisana, waxaa sii dhimanaysa maskaxdaada. Marka ay ku milanto dhiiga, khamriga ayaa gasha dhammaan qaybaha jirkaaga. Qofka khamriga aadka u caba ayay u badan tahay inuu kala kulmo dhibaatooyin xun oo dhanka jirka ah isticmaalka xad dhaafka ah ee khamriga.

Waxaa intaas dheer, waaad baashaali kartaa, nasan kartaa, oo ku raaxaysan kartaa nolosha adiga oo aan khamri cabin. Ugu danbayntii, inaad doorato inaad khamri cabto iyo in kale waa ikhtiyaarkaa. Hase yeeshee, waa qasab, inaad ogaato in ay ***sharci daro*** tahay inaad iibsato khamro haddii aad ka yar tahay 21 sano jir. Waxaa intaas dheer, waa ***sharci daro*** inaad khamri ku qaado gaari ilaa in heerka shaqada ay kamid tahay maahee ama uu kaa codsado waalid ama masuul. Waa sharci daro inaad qaado daroogo sharci daro ah aadna ku qaado gaari marna.

Haddii marna lagugu helo inaad wado gaari adoo jirkaaga khamri ku jiro (ama aad diido inaad marto baaritaanka dhiiga ama neefta) **waxaad lumin doontaa shatigaaga darawalka ugu yaraan hal sano**, haddii lagugu xukumana OUI, waxaa lagu saarayaa ganaax iyo suuragalnimada in xabsiga lagu dhigo.

**FIIRO GAAR AH:** Marka laga hadlaayo sharciyada OUI, dhammaan shatiyada la siiyay dadka aan qaan gaarin (dadka ka yar 21 sano jir) ayaa loo arkaa kuwo ku meel gaar ah si degdeg ah ayaana loo laali karaa ilaa qofku ka gaaraayo da'da 21 sano.

**WAXAA DHEER**

- Diiwaanka danbiga ayaa la tixgeliyaa marka aad codsnayso shaqo, diiwaan gelinta kuleej, adeegga ciidanka, ama daynta.
- Qarashaadka guud ee la xiriira danbiyada OUI (tusaale, ganaaxyada, qarashaadka sareeya ee caymiska, qarashaadka maxkamada) ayaa, inta badan, ku adag dhalinta marka loo eego dadka waawayn, ee dhaqaalaha haysta - $7,240.00 ayay aad ugu adag tahay inuu bixiyo qof aan haysan shaqo ama helaaya mushaarka ugu yar.

**In ka badan nus kamid ah dhalinta ku dhinta shilalka la xiriira khamriga ayaan ahayn kuwo ayago cabsan! Difaac mustaqbalkaaga.**
**Ha wadin gaari adoo cabsan, *ha* raacin qof cabsan.**
**Si amaan ah guriga u tag oo waco tagsi - raac baska - wax saaxiib ama qaraabo ku qaada!**

Ma la noolaan kartaa naftaada haddii aad dishay ama dhaawacday qof adoo gaari wada adoo cabsan? Marka aad gaari wado, waxaad masuul ka tahay badqabka rakaabkaaga, darawallada kale ee wadada, iyo dadka lugaynaaya. Waad difaaci kartaa qoyskaaga iyo saaxiibadaada maaha keliya in aadan cabin khamri kadibna wadin gaari, laakiin sidoo kale ku boorinaaya dadka kale inay sidaas sameeyaan.

**GAAR GO'AANKA SAXDA AH: DOORO NOLOSHA!!**

## Shucuurta

Shucuurta ayaa saamayn kara awoodaada fakarka. Waxay saamaynayaan awoodaada arkida iyo ka jawaabida khataraha sidoo kale. Way adag tahay inaad si sax ah u wado marka aad cabsanayso, farxadu kaa badato, cabsanayso, xanaaqdo, ama murugsan tahay.

Qaababka aad ku maareynayso shucuurtaada:

- Sii naftaada wakhti aad isku dejiso. Qaado socod ama jiif gaaban. Iska ilaali wadada ilaa aad dareento inaad xakamaysan tahay.
- Isa sii wakhti wadis dheeri ah. Xili hore bax.
- U sheeg qof kale inuu wado.

## Caafimaadkaaga

Dhibaato kasta oo dhnka caafimaadka ah ayaa saamayn karta awoodaada gaari wadista sida qaboowga daran, caabuqa, ama fayraska. Xataa dhibaatooyinka yaryar sida qoor xanuunka, qufaca, ama lugta ku xanuunaysa ayaa saamayn kara gaari wadistaada. Haddii aadan "lahayn karitda" u sheeg qof kale inuu gaariga wado.

Marka aad qabto xanuun muddo gaaban, waa inaad go'aansataa haddii ay amaan tahay inaad gaari wado. Marka ay jiraan xaaladaha mudada dheer ee saamayn kara gaari wadistaada Waaxda Gaadiidka ayaa go'aanka door ku yeelanaysa. Qiimeeyaha shatiga darawalka ayaa kaa caawin kara go'aansiga marka iyo qaabka aad si amaan ah gaari ugu wadi karto iyo inaad u baahan tahay iyo kale qalab qaas ah. Dad badan oo qaba xanuunnada mudada dheer ama naafooyinka ayaa shati darawalnimo ka haysta Maine.

Xanuunnada iyo naafooyinka la qiimeeyo waxaa ku jira, laakiin kuma koobna:

- Xanuunnada saamaynaaya feejignaanta: Tusaale, sonkorowga, dhibaatooyinka wadnaha, qalalka, iyo xanuunnada daran ee sanbabada ayaa yareyn kara feejignaanta. Hase yeeshee, haddii xanuunku u muuqdo mid xasiloon si fiicana loola tacaalo waxaad heli kartaa shatiga darawalka ee Maine.
- Naafada jirka: Dad badan ayaa wada ayagoo qabab, tusaale, xanuunka beerka, qalalka, adimada la jaray, baralaatiga, ama Parkinsonism. Dadka qaar ayaa u baahan tababar dheeri ah iyo dabcan qalab gaar ah oo u saaran gaariga kuwaasoo keeni kara xadidaada shatiga.
- Dhibaatooyinka araga iyo maqalka

Haddii xanuunkaagu isbadelay, ama aad biloowday inaad adeegsato qalab gaar ah, qiimeynta darawalka ayaa loo baahan karaa. Qiimeeye ayaa u baahan inuu baaro awoodahaaga go'aaminta haddii aad sii wadi karto inaad si amaan ah u wado gaari aadna ilaashato shatigaaga.

## Su'aalaha Muraajacada ah ee Qaybta 3:

1. Waa maxay heerka BrAC kaasoo lagu cabiro gaari wadista adoo cabsan (O.U.I,) gudaha Maine ee dadka kayar da'da 21 sano.
2. Waa maxay heerka sharciga ah ee BrAC ee go'aaminta O.U.I. ee dadka jira 21 sano iyo ka wayn ee ku dhaqan Maine?
3. Maxaa laga wadaa "ogolaansho rahman"?
4. Waa kee daroogada ugu waxyeellada badan looguna isticmaalka badan yahay Mareykanka maanta?
5. Run mise been? Danbiga O.U.I. ayaa kuugu kici kara qarash ka badan $7,000.
6. Qor sadexda nooc ee kaladuwan ee mashquuliyaasha gaari wadista?

# QAYBTA 4
# Kahor inta Aadan Gaari wadin

## Sixidda Kursigaaga

Toos ugu fariiso dhabarkaaga adoo isku tiirinaaya kursigaaga cagahana sagxada dhigaaya. Hagaaji kursigaaga iyo muraayadahaaga si aad qaab faseex ah wax ugu aragto aagaga gaariga. Waa inaad u fadhido qaab aad si fudud u gaari karto sheelarahaaga. Hagaajinta saxda ah ayaa kuu sahlaysa inaad si raaxo leh ku gaarto isteerinkaaga adoo hadda haysta boos ku filan in aariyada difaacu ku baahdo haddii aad shil gasho. Halkaan ayaad ka helaysaa qaar kamid ah xeerarka guud ee aad raacayso marka aad hagaajinayso kursigaaga:

- Hagaaji kursiga ilaa uu gaaro heer sare oo aad wadada u jeedo. Haddii kursigu aad u hooseeyo, adeegso barkimaha kursiga. Kursiga aad horey ha ugu durjin ilaa aadan isteerinka u wareejin karin si sax ah.



- Waa inaad awoodo inaad cagtaada si fudud uga dhaqaajiso bareegga aadna gayso sheelaraha gaaska adiga oo ciribtaada ku haya sagxada.
- Dusha sare ee isteerinku waa inuusan ka sareyn garbahaaga laakiin waa inuu sidoo kale ka hooseeyaa garkaaga.
- 10 inji ha u dhexayso xabadkaaga iyo isteerinka si bacda aariyadu boos u hesho. Gadaal ha u liicin kursiga.
- Nasiyahaaga madaxa waa inuu taabtaa dhabarka madaxaaga ee ka sareeya heerka dhagaha.

## Hagaajinta Muraayadahaaga




